




Hay'adda Istaatistikada Qaranka

SAHANKA MIISAANIYADDA QOYSKA SOOMAALIYEED, 2022





Hay'adda Istaatistikada Qaranka

SAHANKA MIISAANIYADDA QOYSKA
SOOMAALIYEED, 2022

Febraayo 2023

Hordhac

Hay'adda Istaatistikada Qaranka ayaa sanadkii 2022 samaysay Sahanka Miisaaniyadda Qoyska Soomaaliyeed (SIHBS-2022) markii ugu horreysay tan iyo 1985. Xogta lagu ururiyay sahankan ayaa loo isticmaali doonaa horumarinta Qiyaasta Dhaqaalaha Dalka (GDP) iyo diyaarinta badeecadaha iyo miisaankooda si loo sameeyo qaab cusub oo ah Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB). Ururinta xogta sicirka badeecadaha ayaa muhiim u ah cabirka sicir bararka. Waxaa intaa dheer in sahankan uu saldhig u noqon doono hanaanka la socoshada degdegga ah.

Ujeedada ugu weyn ee laga lahaa SIHBS ayaa ah in la ururiyo xogta loo baahan yahay si lagula socdo istaraatiijiyadda horumarka laga sameeyay yareynta saboolnimada dalka, gaar ahaan fahanka waxtarka ay u leeyihiin siyaasadaha horumarinta, mashaariicda iyo barnaamijyada ku aadan hormarinta heerka nolosha Qoyska Soomaaliyeed. Yoolka ugu muhiimsan ee laga leeyahay Sahanka Miisaaniyadda Qoyska ayaa ah ururinta macluumaad faahfaahsan oo ku aadan kharashaadka qoyska iyo isticmaalka badeecadaha iyo adeegyada si loola socdo nolosha qoyska, si si wanaagsanna loogu cabiro saboolnimada.

Dhamaystirka sahankan waxa uu u baahnaa hanaan wadatashi dhinacyo badan leh, oo uu kamid yahay in safaro lagu tago Dowlad Goboleedyo kala duwan, iyo in qiimeyn lagu sameeyo dukumiintiyada siyaasadaha khuseeya xog ururintan. Guud ahaan Soomaaliya, 7212 qoys oo laga soo xulay 601 goob waraysi ayaa lagu waraystay sahankan. Qiyaastii 35 goob waraysi ayaa laga doortay mid kasta oo kamid ah 17-ka gobol ee ay gaartay xog ururinta, waxaana goob waraysi kasta laga waraystay 12 qoys, taasoo ka dhigan in gobol kasta xogta laga ururiyay tahay 420 qoys.

Sahanka Miisaaniyadda Qoyska wuxuu soo saaraa xog muhiim ah oo lagu cusbooneysiin karo Diiwaanka Dalka ee Hanaanka Cabirka, iyo weliba isticmaalka cusub ee badeecadaha taasoo lagu cusbooneysiin karo cabirka kharashaadka marka la xisaabinayo Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB). Sidaa awgeed, warbixintan ayaa u muhiim u ah buuxinta farqiga xogta dhaqaalaha loo baahan yahay, taasoo sahlaya in si wanaagsan loo fahmo caqabadaha dhaqaale ee haatan taagan iyo fursadaha uu haysto dalkan.

Hay'adda Istaatistikada Qaranka waxa ay ka mahad-naqaysaa dedaalada badan ee gacanta ka geystay in si guul ah lagu soo afmeero sahankan. Hay'addu waxa ay u mahadcelinaysaa qoysaska xogta nala wadaagay, ee waqtigooda u huray ka jawaabidda su'aalaha la weydiiyay. Waxaa sidoo kale bogaadin mudan shaqaalaha xogta soo ururiyay iyo kuwa diiwaangeliyay, kuwaas oo si hawl-karnimo leh u gutay shaqadooda. Waxaan si gaar ah ugu mahadcelinaynaa Dowlad Goboleedyada oo siyaabo kala duwan u caawiyay kooxaha xogta ururinayay, isla markaana xaqiijiyay in hawshan muhiimka u ah qaranka ay si guul ah ku idlaato.

Hay'adda Istaatistikada Qaranka waxa ay si dhab ah u bogaadinaysaa taageerada dhaqaale iyo kaalmada laga helay ururada kala shaqeeya horumarinta iyo taakuladoodii farsamo iyo xirfadeed, gaar ahaan Bangiga Adduunka oo ay shaqaalihiiisa habeen iyo maalinba u soo jeedeen inay soo baxdo warbixintan.

Waxaan rajeynayaa in natiijada warbixinta iyo xogta qaniga ah ee lagu saleeyay ay waxtar u yeelan doonaan dadka dejiya siyaasadaha, maamulayaasha mashaariicda, cilmi-baarayaasha iyo shakhsiyaadka kale ee u baahan warbixinnada noocan ah.



Sharmarke Maxamed Faarax

Agaasimaha Guud

Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya

Mahad-naq

In si guul ah lagu soo gebagabeeyo Sahanka Miisaaniyadda Qoyska Soomaaliyeed 2022 ayaa u baahnayd kaalmo ballaaran oo aan ka helno ha'yadaha nagala shaqeeya horumarinta, taasoo isugu jirta dhinacyada dhaqaalaha iyo farsamada. Waxaan ka mahad-naqayaa taageeradaas. Ugu horreyn, waxaan si gaar ah ugu mahad-celinayaa Bangiga Adduunka oo taageero dhaqaale iyo mid farsamo ku bixiyay inta uu socday sahankan. Waxaan si gaar ah u bogaadinayaa kooxda ay hogaaminayeen Aphichoke Kotikula, Valerie Evans, Berhe Mekonnen Beyene, Shinya Takamatsu, Marie Christelle Mabeu, iyo Matthieu Rouyer oo taageero farsamo nala garab taagnaa laga billaabo diyaarinta ilaa dhamaystirka sahankan.

Waxaan ka mahad-celinayaa taageerada iyo hagidda Ku-xigeenka Agaasimaha Guud Hay'adda Istaatistikada Cabdiraxman Cumar Daahir. Waxaan sidoo kale bogaadinayaa hawsha wanaagsan ee ay qabteen kooxda farsamada ee ay hogaaminayeen Maxamed Cabdinuur, Haashim Sheekh Cabdinuur iyo Cabdi Cali oo dowlad muhiim ah ka qaatay falanqeynta iyo isku dubaridka warbixintan. Waxaan la hilmaami karin guud ahaan shaqaalaha Hay'adda Istaatistikada Qaranka oo xil gaar ah iska saaray in si guul ah uu ku idlaado sahanka.

Hay'addu waxa ay sidoo kale u mahadcelinaysaa qoysaska ka qeyb qaatay sahanka ee waqtigooda u huray in xog ururiyayaasha ay la wadaagaan macluumaadka ku habboon, si loo diyaariyo warbixintan. Waxaan sidoo kale u mahad-naqeynaa Dowlad Goboleedyada dalka, isuduwayaasha sahanka iyo hogaamiyayaasha deegaannada oo si joogta ah gacan uga geystay diyaarinta la waraystayaasha iyo in hannaanka xog ururinta uu noqdo mid fudud.

Warbixinta Sahanka Miisaaniyadda Qoyska Soomaaliyeed 2022 ayaa la filayaa in ay fududeyso hawlaha qorsheynta ee Dowladda Federaalka iyo bulshada ganacsatada ah, iyo in ay horseedo cilmi baaris iyo falanqeyn qoto dheer. Waxaan rajeynaynaa in warbixintan ay ka faa'iideysan doonaan dadka dejiya qorshayaasha iyo siyaasadaha, hay'adaha aan dowliga ahayn, aqoonyahannada, iyo saamileyda kale sida hay'adaha qaranka, kuwa gobolka iyo kuwa caalamiga ah.

Sharmarke Maxamed Faarax

Agaasimaha Guud

Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya

Table of Contents

| | |
|--|----|
| GOGOL-DHIGGA IYO HABKA LOO MARAY SAHANKAN | 6 |
| QAAB DHISMEEDKA QOYSKA | 10 |
| WAXBARASHADA | 17 |
| CAAFIMAADKA, SIGAAR CABIDDA & TALLAALKA COVID-19 | 25 |
| GOOBTA WARAYSIGA QOYSKA IYO LAHAANSHAHA HANTIDA WAARTA | 35 |
| TAMARTA, BIYAHA, IYO FAYO-DHAWRKA | 41 |
| DHAQ-DHAQAAQA DHAQAALAHA IYO BEERAHA | 49 |
| GANACSIYADA QOYSKA EE AAN BEERAHA AHAYN IYO DAKHLIGA SHAKHSIYAADKA | 56 |
| SUGNAANTA CUNNADA IYO DHIBAATOYINKA | 61 |
| DEYNTA, DAKHLIGA, ADEEGYADA MAALIYADDA IYO TIKNOOLAJIYADDA | 67 |

1

GOGOL-DHIGGA IYO HABKA LOO MARAY SAHANKAN

Farriimo muhiim ah:

- Sahanka Miisaaniyadda Qoyska Soomaaliyeed (SIHBS) ayaa lagu hirgeliyay taageero laga helay Bangiga Adduunka, taasoo qeyb ka ah Mashruuca Tayaynta Awoodda Dhaqaalaha iyo Istaatistikada Soomaaliya.
- Ujeedooyinka laga leeyahay SIHBS waxaa kamid ah in lala socdo nolasha qoyska, la cabiro saboolnimada, la ogaado xaaladda nolaleed ee qoysaska Soomaaliyeed, sida helitaanka waxyaabaha assaasiga ah, adeegyada iyo hagaajinta qiyaasidda dhaqaalaha dalka iyo in la isu geeyo dembiisha badeecadaha ee loo isticmaalo sameynta Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) oo cusub.
- Sahanka SIHBS ayaa lagu ururiyay xogta 7212 qoys oo ku nool magaalooyinka, tuulooyinka iyo weliba dad reer guuraa ah, kana soo jeeda 17 gobol. Waxaa xogtaas la ururiyay muddadii u dhexaysay 10-kii May ilaa 31-kii July 2022.

1.1 Gogol-dhig

Soomaaliya ayaa samaysay Qorshaha Horumarinta Qaranka 9-aad (NDP9) ee 2020-2024, kaasoo noqonaya Istaraatiijiyadda Kumeelgaarka ah ee Yareynta Saboolnimada ee hindisaha dalalka faqriga ah isla markaana lagu leeyahay denyta badan. Bishii March 2020, Soomaaliya ayaa gaartay heerka go'aan gaaridda ee hannaanka deyn cafinta, iyadoo Hay'adda Lacagta Adduunka (IMF), iyo Ururka Horumarinta Caalamiga ah ee Bangiga Adduunka (IDA) ay ku qanceen in Soomaaliya ay qaaday tallaabooyinka looga baahan yahay si loogu sameeyo deyn cafin.

Hase yeeshee tallaabooyinka ugu muhiimsan marxaladda go'aan gaaridda ayaa waxaa kamid ah in si lagu qanci karo loo hirgeliyo istaraatiijiyadda yareynta saboolnimada.

Soomaaliya ayaa dhisaysa awooddeeda istaatistikada si ay gacan uga geysato hirgelinta siyaasado dhaqaale iyo bulsho oo ku salaysan caddeymo muuqda, isla markaana hagi kara maalgelinta qeybaha kala duwan, oo lagula socon karo guulaha laga gaaray yoolalka horumarinta si waaqafsan heerarka caalamiga ah ee tebinta xogta dhaqaalaha guud ee dalalka lagu leeyahay deymaha badan.

1.2 Ujeedooyinka

Ujeedooyinka ugu waa weyn ee laga leeyahay Sahanka Miisaaniyadda Qoyska Soomaaliyeed (SIHBS) ayaa ah in a) lala socdo heerka nolasha, b) la helo xogta dhaqaalaha guud, isla markaana gundhig loo sameeyo hannaanka joogtada ah ee xog ururinta mustaqbalka iyo c) in la dhiso awoodda farsamo iyo maamul ee ay u baahan tahay Hay'adda Istaatistikada Qaranka si ay mustaqbalka u fuliso Sahanka Miisaaniyadda Qoyska Soomaaliyeed iyada oo ka maaranta kaalmo dibedda ah.

Yoolka ugu muhiimsan ee laga leeyahay sahanka miisaaniyadda qoyska ayaa ah ururinta macluumaad faahfaahsan oo ku aaddan kharashaadka qoyska iyo isticmaalka badeecadaha iyo adeegyada si loola socdo nolasha qoyska, si wanaagsanna loogu cabiro saboolnimada. Marka laga sootago xogta heerka nolosha, SIHBS ayaa lagu ururiyay macluumaadka bulsho-dhaqaale ee muhiimka u ah la socoshada xaaladaha nolosha ee qoyska Soomaaliyeed, sida helitaanka waxyaabaha asaasiga ah iyo adeegyada.

Ujeedooyinka gaarka ah ee SIHBS ayaa ah:

- In la helo cadadka badeecadaha ee isticmaalka qoyska taasoo cabir u noqonaysa isu geynta Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB). Ururinta xogta sicirka badeecadaha ayaa muhiim u ah cabirka sicir bararka.
- In la qiyaaso kharashaadka qoyska ee tilmaamaha diiwaanka qaran, sida dhaqaalaha guud ee dalka (GDP).
- In la darso dakhliga/kharashaadka dadka nugul sida qoyska hawlgabka ah, kuwa carruurta hal waalidka qura leh, iwm.
- In la darso farqiga dakhliga/kharashaadka qoyska ee bulsho-dhaqaale
- In la darso habdhaqanka wax iibsiga ee qeybaha kala duwan ee bulshada, guud ahaan heerka saboolnimada iyo qeybsanaanta dakhliga, si loo fahmo waxa ugu yar ee qofku ku noolaan karo.
- In la xoojiyo awoodda shaqaalaha istaatistikada ee hay'adda, isla markaana tababar buuxa la siiyo xog ururiyayaasha si ay u fahmaan hannaanka iyo habraaca sahanka, xog ururinta, diyaarinta xogta, darsideeda iyo faafinteeda.

1.3 Nashqadda Sahanka

Sahanka Miisaaniyadda Qoyska Soomaaliyeed (SIHBS) ayaa ah xog ururin lagu saleeyay 7212 qoys¹ oo metalayay heer goboleed², magaalooyinka, tuulooyinka iyo deegaannada reer guuraaga ee heer qaran. Qof kasta (qoys kasta) oo lagu waraystay sahanka ayaa metalayay qeyb kamid ah bulshada la doonayay oo ay waxbadan wadaagaan.

Sahanka SIHBS ayaa lagu bartilmaameedsaday qoysaska ku nool goob waraysiyada xog ururinta lagu sameeyay ee magaalooyinka, tuulooyinka iyo reer guraaga. Sahankan ayaa loo adeegsaday

muunad lagu saleeyay Sahanka Tirakakoobka Caafimaadka Soomaaliya (SHDS) 2020. Sidoo kale dadka la waraystay waxaa kamid ah kuwo ka soo barakacay guryahooda.

Samaynta muunadda SIHBS ayaa raacay hannaanka loo yaqaan stratified multi-stage probability cluster sample design. Dadka ku nool magaalooyinka iyo tuulooyinka ayaa la mariyay kala hufid saddex heer ah, halka kuwa reer guuraaga ah loo kala saaray laba heer. Dadka loo doortay inay ka qeyb qaataan sahankan ayaa laga soo xushay xaafadaha goob waraysiga xog ururinta. Dadka ku nool magaalooyinka iyo tuulooyinka ayaa ka hor inta aan loo xulin ka qeybgalka sahankan waxaa la diiwaangeliyay qoysaskooda. Qoysaska la waraystay ayaa markaa kadib iyago oo la siinayo fursad siman oo aan qaab gaar ah loo kala sooceyn loo xushay sahanka.

Marka koobaad, 100% qoysaska ku jiray muunadda ee goob waraysiga laga doortay magaalooyinka, tuulooyinka iyo reer guuraaga ayaa loo diiwaangeliyay heerka koobaad, taasoo lagu ururiyay xogta madaxa qoyska, xaaska, qeexidda goobta ay ku noolyihiin, GPS-ka iyo astaan u gaar ah qoyskaas. Xogta qoyska la diiwaangeliyay ayaa lagu ururiyay qalab elektoroonig ah, kadibna xogtaas ayaa la kala shaandheeyay oo waxaa laga soo saaray xogta dhammaan qoysaska laga diiwaangeliyay goob waraysi kasta oo loogu talo-galay sahanka. Kadib waxaa loo gudbay heerka labaad oo ah in celcelis ahaan 12 qoys laga xusho goob waraysi kasta. Qoys kasta waxa ay muhiimadu ahayd in laga waraysto qofka madaxda u ah³ sida aabaha ama hooyada. Haddii labaduba la waayo, waxaa su'alaaha la weydiinayay qof ka tirsan qoyskaas oo da'diisu ka weyn tahay 16 jir, isla markaana si wanaagsan u fahansan kharashaadka iyo isticmaalka qoyskaas.

¹Qoys waxaa lagu qeexay dad ku wada nool hal guri, isku weel ah, uu hal qof madax u yahay, isla markaana kharashkoodu uu mid yahay.

²Muunadda sahankan waxaa laga ururiyay 17 gobol oo kamid ah 18-kii gobol ee ay Soomaaliya ka koobneyd qaran jabkii ka hor. Waxaa sababo amni awgood looga reebay gobolka Jubada Dhexe.

³Madaxa qoyska waa qof mas'uulka ka ah dadka gurigaas ku nool ee u gaara go'aannada. Waa qofka ay mas'uulka u aqoonsan yihiin xubnaha kale ee qoyska, Inta badan, qofkaas waxa uu ka qeyb qaataa arrimaha dhaqaalaha, xakameynta iyo nolosha qoyskaas.

Guud ahaan Soomaaliya, 7212 qoys oo laga soo xulay 601 deegaan ayaa lagu waraystay sahankan. Qiyaastii 35 goob waraysi ayaa laga doortay mid kasta oo kamid ah 17-ka gobol ee ay gaartay xog ururinta, waxaana goob waraysi kasta laga waraystay 12 qoys, taasoo ka dhigan in gobol kasta xogta laga ururiyay 420 qoys.

Tirada guud ee dadka lagu waraystay sahankan oo loo kala saaray halka ay ku nool yihiin ayaa ku xusan Jadwalka hoose:

Jadwalka 1: Inta ay ka kooban tahay muunadda ugu dambaysay

| Halka ay ku noolyihiin | Tirada goob waraysi | Tirada Qoyska |
|------------------------|---------------------|---------------|
| Magaalo | 362 | 4,344 |
| Tuulo | 159 | 1,908 |
| Reer Guuraa | 80 | 960 |
| Wadarta | 601 | 7,212 |

1.4 Qalabka, Tababarka Shaqaalaha, Hawsha iyo Ilaalinta Tayada

Qalabka

Su’aalaha dadka lagu weydiiyay sahanka ayaa ka koobnaa saddex qeybood:

- Qeybta xogta guud ee bulshada, sida waxbarashada, caafimaadka, shaqada, kala dhimanaanta lixaadka, aragtida amni, tiknoolajiyadda iyo xiriirka madaxa qoyska.
- Qeybta xogta qoyska, gaar ahaan goob waraysiga, lahaanshaha dhulka iyo hantida waarta, helitaanka adeegyada asaasiga ah, sugnaanta cunnada, ka falcelinta musiibooyinka, ganacsiga qoyska, sida beeraha, kalluunka iyo xoolaha, helitaanka adeegyada maaliyadda iyo lacaga loo soo diro
- Qeybta isticmaalka qoyska, gaar ahaan macluumaad faahfaahsan oo ku aaddan kharashaadka ku baxa cunnada iyo waxyaabaha aan cunnada ahayn.

Su’aalaha sahanka iyo foomka diiwaangelinta ayaa lagu diyaariyay barnaamijka Survey Solutions si loogu isticmaalo waraysiga uu Kombiyuutarka gacanta ka geysto ee loo yaqaan CAPI, waxaana ay xog ururiyaasha isticmaalayeen tableetyo. Tijaabooyin iyo hubin is xig-xiga ayaa lagu sameeyay qaabka su’aalaha si loo xaqiijiyo in dhammaantood ay yihiin kuwo si wanaagsan looga jawaabi karo. Waxaa intaa dheer in su’aalaha la diyaariyay lagu tijaabiyay luuqada Ingiriiska. Tani ayaa u sahashay

xog ururiyayaasha inay hubiyaan fahanka luuqada, qaab dhismeedka su’aalaha waraysiga iyo mudada uu qaadan karo halkii waraysi.

Laba tarjumaan ayaa si madax bannaan dhammaan qeybaha waraysiga ugu fasiray luuqada Soomaaliga, waxaana tarjumaan saddexaad uu isu geeyay fasiraadaha labada tarjumaan si loo hubiyo in su’aalaha lagu gudbiyay micnaha saxda ah. Soomaaliga la tarjumay ayaa dib loogu bedalay Ingiriis, si loo hubiyo tayadiisa. Intaa kadib, waxaa su’aalaha waraysiga oo Soomaali ah lagu tijaabiyay goob waraysiga xog ururinta, waxaana la saxay khaladaadkii ay soo tebiyeen xog ururiyayaasha. Ugu dambeyn, kadib markii tifaftir lagu sameeyay Soomaaliga iyo Ingiriiska ayaa waxaa lagu tababaray kooxaha loo igmaday xog ururinta.

Tababarka Shaqaalaha

Tababarka kooxaha hawsha qabanayay ayaa loo agaasimay saddex heer: Tababarka tababarayaasha (ToTs), tababarka diiwaangelinta qoysaska iyo tababarka xog ururiyayaasha iyo korjoogayaashooda fulinaya sahanka guud.

- Tababarka tababarayaasha ayaa ahaa 18 tababarayaal oo qaatay duruus todobaad socotay, isla markaana lagu siiyay macluumaadka qeybaha ugu muhiimsan sahanka.
- 200 oo qof oo isugu jira xog ururiyayaal iyo

kormeerayaal ayaa markii hore loo qabtay tababar todobaad qaatay oo ku aaddan qaabka diiwaangelinta qoysaska, kadibna waxaa la baray qalabka lagu qabanayo hawsha sahanka.

- Xiisadaha tababarka ee sahanka guud ayaa lagu qabtay isla goobta xog ururiyayaasha lagu baray qaabka diiwaangelinta qoysaska, waxaana xiisadahaas iyo tijaabadooda ay socdeen muddo saddex todobaad ah. Tijaabooyinka ayaa la sameeyay durbadiiba marka uu dhammaaday tababarka diiwaangelinta qoyska. Tababarka guud ayaa ka koobnaa qalabka xog ururinta, dib u eegis ballaaran oo ku aaddan hannaanka waraysi qaadidda iyo anshaxa cilmi-baarista.

Hawsha Sahanka

Hawsha sahanka ayaa la fuliyay mudadii u dhexaysay 10-kii May ilaa 31-kii July 2022. Xog ururinta ayaa ahayd waraysiyo fool-ka-fool ah⁴ oo guryaha lagula yeeshay dadka la waraysanayay, iyadoo la adeegsaday hannaanka CAPI. Xog ururiyayaasha ayaa isticmaalay tableetyo, iyagoo dadka weydiinayay su'aalaha lagu diyaariyay barnaamijka Survey Solutions. Durbadiiba marka uu xog ururiyaha dhameeyo waraysiga, waxaa macluumaadka uu si toos ah ugu dhacayay xarunta dhexe ee xog qabashada (servers).

Heerka jawaab-celinta ayaa wadar ahaan ahayd 96%. Jawaab-celinta ugu saraysa waxaa bixiyay reer guraaga oo 99% ka qeyb qaatay sahanka, reer tuulooyinka ayaa 97% ka qeyb qaatay sahanka, halka reer magaalka ay jawaab-celintoodu ahayd 95%.

Ilaalinta Tayada

Hannaanka xog ururinta ayaa waxaa la mariyay nidaam adag oo lagu xaqiijinayo tayada, kaasoo lagu sameeyay heerarka kala duwan ee intii ay hawshu socotay. Waxaa kamid ahaa in la korjoogo xog ururiyayaasha marka ay qaadayaan waraysiyada,

booqashada goobaha ay ka socoto xog ururinta, ku noqoshada goobaha, iyo xaqiijinta tayada xogta la ururiyay. Gobol kasta waxa uu lahaa koox madax bannaan oo hubisa tayada xogta, waxaana ay toos u hoos tagayeen maamulaha mashruuca.

Korjoogayaasha ayaa goobjoog u ahaa 10-15 boqolkiiba dhammaan waraysiyada uu qaaday xog ururiye kasta, waxaana korjoogteyntaas ay si xawli ah u socotay maalmihii ugu horreeyay xog ururinta, si loo saxo khaladaadka ay galayeen xog ururiyayaasha. Sidoo kale, hubin kale ayaa lagu sameeyay 5% waraysiyada la qaaday.

1.5 Qaabeynta Warbixinta Sahanka

Qeybaha soo socda ee warbixinta ayaa u qaabeysan sida hoos ku xusan:

- Cutubka II oo lagu soo bandhigay macluumaadka qeybaha uu ka kooban yahay qoyska.
- Cutubka III oo lagu soo bandhigay macluumaadka waxbarashada.
- Cutubka IV oo looga hadlay macluumaadka caafimaadka, sigaar cabidda iyo tallaalka Covid-19
- Cutubka V oo lagu soo bandhigay macluumaadka goob waraysiyada, lahaansha hantida waarta, iyo amniga
- Cutubka VI oo looga hadlay macluumaadka tamarta, biyaha iyo faya-dhawrka
- Cutubka VII oo lagu soo bandhigay macluumaadka dhaq-dhaqaaqa dhaqaale iyo beeraha
- Cutubka VIII oo diiradda lagu saaray ganacsiyada qoysaska ee aan beeraha ahayn iyo dakhliga shakhsiyaadka
- Cutubka ix: sugnaanta cunnada iyo musiibooyinka
- Cutubka x: Deymaha, dakhliga, adeegyada maaliyadda

⁴Xog ururiyayaasha ayaa loo oggolaaday in 8 goob waraysi oo ka tirsan gobollada Baay iyo Shabeellada Hoose ay dadkooda ku warayaan telefoonka, amni darro jirta awgeed. Kooxaha xog ururinta oo gacan ka helaya mas'uuliyiinta maamulka iyo odayaasha deegaannada ayaa xushay oo la xiriiray reer guuraaga ku sugan goob waraysiyadaas.

2

QAAB DHISMEEDKA QOYSKA

2.1 Gogol-dhig

Cutubkan waxaa lagu soo bandhigay sharraxaad kooban oo ku aaddan qaab dhismeedka qoyska, sida tirada dadka uu ka kooban yahay, jinsigooda, da'dooda, guurka iyo haysashada aqoonsiga ay bixiso dowladda.

2.2 Tirada Qoyska

Celcelis ahaan tirada uu ka kooban yahay qoyska ayaa waxaa lagu saleeyay tirada dadka ku nool guri kasta oo loo qeybiyay tirada guryaha⁵. Celcelis ahaan, tirada qoyska ay ka kooban yihiin ayaa

noqotay 6.7 qof dalka oo dhan, balse waxaa jira farqi u dhexeeya magaalooyinka oo dhinac ah iyo tuulooyinka/reer guuraaga oo dhinac kale ah.

Jadwalka 2.1 waxa ay muujinaysaa macluumaadka tirada uu ka kooban yahay qoyska iyo celcelis ahaan tiradaas marka loo eego goob waraysiyada ay ku nool yihiin. Qeybta qoyska weyn (xubnahoodu ka badan yihiin 9 qof) ayaa noqotay 23.4%, kuwaas oo 26.8% kamid ah ay ku nool yihiin magaalooyinka, halka 18.0% ay degan yihiin tuulooyinka, waxaana 18.4% ay yihiin reer guuraa. Tani ayaa muujinaysa in kobaca magaalooyinka aanay ku salaysneyn oo keliya hayaanka (guuritaanka), balse uu sidoo kale ku xiran yahay xajmiga qoyska.

Jadwalka 2.1: Tirada Qoyska

| Boqollayda tirada qoyska, celcelis ahaan tirada qoyska ee goob waraysiga | | | | |
|--|------------------------|---------|-------------|-------|
| Tilmamaaha | Goobta ay degan yihiin | | | |
| | Tuulo | Magaalo | Reer Guuraa | Wadar |
| Celcelis ahaan tirada qoyska | 6.2 | 7.0 | 6.1 | 6.7 |
| Tirada xubnaha caadiga ah | | | | |
| 1 | 1.1 | 0.6 | 0.4 | 0.7 |
| 2 | 3.9 | 2.4 | 4.5 | 3.1 |
| 3 | 8.6 | 6.4 | 9.1 | 7.3 |
| 4 | 12.4 | 9.7 | 14.0 | 10.9 |
| 5 | 17.8 | 13.9 | 17.6 | 15.4 |
| 6 | 14.8 | 14.1 | 16.9 | 14.7 |
| 7 | 14.2 | 14.0 | 12.1 | 13.8 |
| 8 | 9.3 | 12.0 | 6.9 | 10.6 |
| 9+ | 18.0 | 26.8 | 18.4 | 23.4 |
| Wadar | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 |

⁵Hannaankan celceliska qaabka fudud ah ma aha mid si dhab ah loogu isticmaalay warbixintan. Si lamid ah istaastikada kale ee lagu soo bandhigay warbixintan, qiimeyn kasta oo sambalka ah waxaa lagu cabiray qaabka loo yaqaano inverse of the probability

2.3 Qaab dhismeedka da'da iyo jinsiga

Jadwalkan 2.2 waxa ay muujinaysaa bulshada oo loo qeybiyay da'da, goobta waraysiga (magaalooyinka, tuulooyinka iyo reer guuraaga) iyo jinsiga. Qaab dhismeedka da'da ayaa muujinaya bulsho ay dhalinyaradu ku badan yihiin. Da'da iyo jinsiga ayaa muhiim u ah fahanka arrimaha bulshada marka la eegayo istaastikada iyo sahanka. Qeybta ugu badan bulshada Soomaaliyeed ayaa ah carruurta da'doodu u dhexayso 5-9 jir kuwaasoo u dhigma 18.9%, halka 0.7% oo keliya ay da'doodu ka weyn tahay 80 jir.


Jadwalka 2.2 Tirada dadka oo loo kala qeybiyay da'da, jinsiga iyo goobta waraysiga

Boqollayda tirada qoyska oo loo kala qeybiyay da'da, jinsiga iyo goobta waraysiga, SIHBS 2022

| Tilmaamaha | Tuulo | | | Magaalo | | | Reer Guuraa | | Wadar | | | |
|-----------------------|-------|--------|-------|---------|--------|-------|-------------|--------|-------|--------|-------|-------|
| | Lab | Dhedig | Wadar | Lab | Dhedig | Wadar | Lab | Dhedig | Lab | Dhedig | Wadar | |
| Da'da | | | | | | | | | | | | |
| <5 | 19.1 | 17.2 | 18.1 | 16.6 | 15.0 | 15.8 | 18.6 | 17.9 | 18.2 | 17.4 | 15.9 | 16.6 |
| 5-9 | 22.7 | 19.1 | 20.8 | 18.6 | 17.7 | 18.2 | 18.3 | 20.0 | 19.1 | 19.6 | 18.3 | 18.9 |
| 10-14 | 16.4 | 15.7 | 16.0 | 16.8 | 15.1 | 15.9 | 18.1 | 14.7 | 16.4 | 16.8 | 15.2 | 16.0 |
| 15-19 | 8.7 | 10.4 | 9.6 | 12.5 | 12.8 | 12.6 | 9.9 | 9.9 | 9.9 | 11.3 | 11.9 | 11.6 |
| 20-24 | 4.5 | 7.7 | 6.2 | 7.9 | 9.0 | 8.5 | 5.8 | 7.8 | 6.8 | 6.8 | 8.5 | 7.7 |
| 25-29 | 4.5 | 5.7 | 5.2 | 5.1 | 6.8 | 6.0 | 4.4 | 7.7 | 6.0 | 4.9 | 6.6 | 5.8 |
| 30-34 | 4.9 | 6.0 | 5.4 | 4.7 | 5.7 | 5.2 | 5.8 | 5.5 | 5.6 | 4.9 | 5.7 | 5.3 |
| 35-39 | 4.0 | 5.0 | 4.5 | 4.0 | 4.9 | 4.5 | 4.3 | 4.8 | 4.5 | 4.0 | 4.9 | 4.5 |
| 40-44 | 5.2 | 3.7 | 4.4 | 3.5 | 3.5 | 3.5 | 4.6 | 3.5 | 4.1 | 4.1 | 3.6 | 3.8 |
| 45-49 | 2.0 | 2.2 | 2.1 | 2.3 | 2.3 | 2.3 | 1.5 | 1.7 | 1.6 | 2.2 | 2.2 | 2.2 |
| 50-54 | 2.7 | 1.6 | 2.1 | 2.6 | 2.2 | 2.4 | 2.7 | 2.4 | 2.5 | 2.7 | 2.1 | 2.4 |
| 55-59 | 1.3 | 0.9 | 1.1 | 1.4 | 1.0 | 1.2 | 1.7 | 1.0 | 1.3 | 1.4 | 1.0 | 1.2 |
| 60-64 | 1.3 | 1.8 | 1.6 | 1.6 | 1.4 | 1.5 | 2.0 | 1.9 | 2.0 | 1.6 | 1.6 | 1.6 |
| 65-69 | 0.5 | 0.8 | 0.6 | 0.6 | 0.5 | 0.6 | 0.7 | 0.3 | 0.5 | 0.6 | 0.6 | 0.6 |
| 70-74 | 1.2 | 1.0 | 1.1 | 0.8 | 0.9 | 0.8 | 0.7 | 0.5 | 0.6 | 0.8 | 0.9 | 0.9 |
| 75-79 | 0.2 | 0.2 | 0.2 | 0.3 | 0.3 | 0.3 | 0.4 | 0.0 | 0.2 | 0.3 | 0.2 | 0.2 |
| 80+ | 0.8 | 0.9 | 0.8 | 0.7 | 0.7 | 0.7 | 0.6 | 0.6 | 0.6 | 0.7 | 0.8 | 0.7 |
| Wadar | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 |
| Da'da ku tiirsanaanta | | | | | | | | | | | | |
| 0-14 | 58.2 | 52.1 | 55.0 | 51.9 | 47.9 | 49.8 | 54.9 | 52.6 | 53.8 | 53.8 | 49.4 | 51.5 |
| 15-64 | 39.1 | 45.0 | 42.2 | 45.7 | 49.7 | 47.8 | 42.8 | 46.0 | 44.4 | 43.8 | 48.1 | 46.0 |
| 65+ | 2.7 | 2.9 | 2.8 | 2.4 | 2.4 | 2.4 | 2.3 | 1.4 | 1.9 | 2.4 | 2.4 | 2.4 |
| Wadar | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 |

Heykalka da'da bulshada ee ka muuqda hoos waxa uu muujinayaa in Soomaaliya ay leedahay dhalinyaro badan. Sawirka ayaa sii yaraada markasta oo da'da ay kor u dhaafto 60, iyadoo ay yar yihiin ragga da'doodu ka sarayso 80 jirka marka loo eego dumarka.


Figure 2.1: Heykalka da'da bulshada, SIHBS 2022



2.4 Heer ku tiirsanaanta

Heerka ku tiirsanaanta ayaa ah tirada dadka u baahan kaalmada sida kuwa ay da'doodu ka hooseyso 15 jirka iyo kuwa ay da'doodu ka weyn tahay 64, oo loo qeybiyay wadarta dadka da'doodu u dhexayso 15 ilaa 64. Tilmaantan ayaa muujinaysa tirada bulshada ee aan shaqeyn karin, iyadoo la barbar dhigayo kuwa shaqeyn kara. Heerka ku tiirsanaanta ayaa aad u sarreeya goob waraysiga reer guuraaga (121%) iyo tuulooyinka (131%), halka uu magaalooyinka ka yahay 106% (Figure 2).

Figure 2.2: Heerka ku tiirsanaanta marka loo eego goobta waraysiga, SIHBS 2022




2.5 Saamiga Jinsiga

Saamiga jinsiga ayaa ah tirada ragga marka la barbar dhigo dumarka, waxaana inta badan loo dhigaa tirada ragga oo loo qeybiyay boqol dumar ah. Haddii tiradaas ay ka yartahay 100, waxa ay muujinaysaa in dumarka ay ka badan yihiin ragga. Saamiga jinsiga ee guud ahaan bulshada da' kastaba waxa ay noqotay 93.4.

Figure 2.3 waxa uu muujinayaa kala duwanaashaha jinsiga ee da'da. Saamiga jinsiga ayaa isu dheeli tiran da'da 0-14 jir, halka dhalinyarada (15-35 jir) ay muuqato in dumarka ay ka badan yihiin ragga. Farqigaas ayaa sii kordha marka la eego da' dhexaadka iyo da'aha waaweyn.


Figure 2.3: Saamiga jinsiga ee da'da kala duwan, SIHBS 2022



2.6 Heerka guurka

Kala bar bulshada Soomaaliya ee da'doodu ka weyn tahay 15 jirka ayaa guursaday (50.5%), halka 37.9% aanay weligood guursan. Boqollayda dadka uu qoyska ka burburay ayaa waxyar ka hoosaysa (5.5%) marka la barbar dhigo kuwa uu lammaanahooda ka geeriyooday (6.1%). (Figure 2.4).

Figure 2.4: Heerka guurka, SIHBS 2022



Jadwalka 2.3 waxa uu muujinayaa heerka guurka ee bulshada ay da'doodu ka sarrayso 15 jirka. Dadka aan weligood guursan ee da'doodu u dhexayso 15 ilaa 19 jirka ayaa ah 93.3%, hase yeeshee tiradaas ayaa aad u yaraata marka ay da'du kororto. Keliya 4.2% dadka da'doodu u dhexayso 35 ilaa 39 ayaan weligood guursan. Haatan waxa uu guurka ugu badan yahay da'aada 35 ilaa 44 oo waxaa dadkaas guursaday 85%. Furriinka ayaa ku badan da'aada 25 ilaa 29 oo waxa uu gaaray 9.1%, halka da'aada 30 ilaa 34 uu yahay 7.6%.

Dadka aan weligood guursan ayaa u badan magaalooyinka (42.1%) halka tuulooyinka ay tahay 30%, reer guuraagana ay gaarsiisan tahay 29.4%. Guurka ugu badan ayaa waxaa sameeyay reer guuraga (63.1%) halka uu yaryahay furriinta (3.1%). Furriinka ayaa ugu badan tuulooyinka (5.9%), waxaana xiga magaalooyinka (5.5%).

Dadka aan helin waxbarashada rasmiga ah ayaaa u badan kuwa guursada (24.8%), sidoo kale waxaa ku badan furriinka, kala tagga iyo geerida lamaanaha. Waxa ay u badan tahay inuu yaraado heerka furriinka markasta oo ay siyaado waxbarashada qofka.

Jadwal 2.3: Heerka guurka ee da'aha kala duwan, goobta waraysiga iyo heerka waxbarashada

| Boqolleyda bulshada da'doodu ka sarayso 15 iyo heerka guurka, SIHBS, 2022 | | | | | |
|---|-------------|-----------|---------|--------------|-------|
| Tilmaamaha | Aan guursan | Guursaday | Furriin | Laga dhintay | Wadar |
| Da'da | | | | | |
| 15-19 | 93.3 | 5.2 | 1.2 | 0.2 | 100.0 |
| 20-24 | 61.1 | 32.2 | 6.1 | 0.6 | 100.0 |
| 25-29 | 29.2 | 60.4 | 9.1 | 1.2 | 100.0 |
| 30-34 | 11.8 | 77.5 | 7.6 | 3.1 | 100.0 |
| 35-39 | 4.2 | 85.6 | 6.3 | 3.9 | 100.0 |
| 40-44 | 3.7 | 84.6 | 6.3 | 5.3 | 100.0 |
| 45-49 | 2.3 | 80.0 | 6.8 | 10.8 | 100.0 |
| 50-54 | 1.9 | 76.5 | 6.8 | 14.8 | 100.0 |
| 55-59 | 2.1 | 74.2 | 5.0 | 18.8 | 100.0 |
| 60-64 | 1.7 | 64.1 | 6.6 | 27.6 | 100.0 |
| 65-69 | 1.9 | 63.8 | 3.8 | 30.6 | 100.0 |
| 70-74 | 2.2 | 51.4 | 3.9 | 42.5 | 100.0 |
| 75-79 | 1.0 | 53.3 | 5.9 | 39.9 | 100.0 |
| 80+ | 3.0 | 40.9 | 5.2 | 51.0 | 100.0 |
| Goobta waraysiga | | | | | |
| Tuulo | 30.0 | 57.0 | 5.5 | 7.4 | 100.0 |
| Magaalo | 42.1 | 46.2 | 5.9 | 5.9 | 100.0 |
| Reer Guuraa | 29.4 | 63.1 | 3.1 | 4.4 | 100.0 |
| Heerka ugu sarreeya waxbarashada | | | | | |
| Aan helin waxbarasho rasmi ah | 24.8 | 59.9 | 6.4 | 8.9 | 100.0 |
| Dugsi hoose | 54.7 | 38.4 | 4.8 | 2.1 | 100.0 |
| Dugsi sare | 64.4 | 30.8 | 3.6 | 1.2 | 100.0 |
| Waxbarasho sare | 59.0 | 37.3 | 2.9 | 0.8 | 100.0 |
| Wadar | 37.9 | 50.5 | 5.5 | 6.1 | 100.0 |

2.7 Dukumiintiga Aqoonsiga

Jadwalka 2.4 waxaa lagu soo koobay lanaashaha dukumiintiyada aqoonsiga ah ee ay bixiyaan hay'adaha dowladda. Keliya 4.1% dadka qaangaarka ah ee da'doodu ka weyn tahay 15 jir ayaa haysta baasaboorka oo ah aqoonsiga keliya ee laga oggol yahay Soomaaliya oo dhan, halka 11.3% dadka waaweyn ay leeyihiin aqoonsiyo kale⁶. Tirada ugu badan ee shacabka Soomaaliya (84.7%) ayaan haysan wax dukumiinti aqoonsi ah.

5.1% ragga ayaa haysta baasaboorka Soomaaliga, halka dumarka ay ka haystaan 3.2% oo keliya.

Waxaase ay ka siman yihiin haysashada noocyada kale ee aqoonsiga. Tirada dadka ugu badan ee baasaboorka haysta (12.5%) ayaa ah kuwa da'doodu u dhexayso 75 ilaa 79 jir, halka 1.6% keliya ay baasaboorka ka haysataan dhalinyarada da'doodu u dhexayso 15 ilaa 19 jirka. Dadka magaalooyinka ku nool ayaa u badan kuwa qaatay baasaboorka (5.6%), halka reer tuulooyinka ay qaateen (1.5%), reer guuraagana (0.2%).

Jadwal 2.4: Lahaanshaha aqoonsiga ay dowladda bixisay

| Lahaanshaha aqoonsiga ay dowladdu bixisay marka loo eego jinsiga, da'da, iyo goobta waraysiga | | | |
|---|---------------|-------------|----------------------------|
| Tilmaamaha | Aan lahayn ID | Baasaboorka | Noocyada kale ee aqoonsiga |
| Jinsiga | | | |
| Lab | 83.4 | 5.1 | 11.6 |
| Dhedig | 85.9 | 3.2 | 11.0 |
| Da'da | | | |
| 15-19 | 92.4 | 1.6 | 6.0 |
| 20-24 | 85.9 | 3.3 | 10.8 |
| 25-29 | 82.6 | 5.1 | 12.4 |
| 30-34 | 81.1 | 4.6 | 14.3 |
| 35-39 | 84.0 | 4.5 | 11.6 |
| 40-44 | 83.5 | 3.8 | 12.7 |
| 45-49 | 79.3 | 5.2 | 15.5 |
| 50-54 | 76.6 | 7.3 | 16.1 |
| 55-59 | 76.8 | 7.8 | 15.4 |
| 60-64 | 82.3 | 5.6 | 12.1 |
| 65-69 | 86.0 | 8.2 | 5.8 |
| 70-74 | 80.6 | 5.8 | 13.6 |
| 75-79 | 82.6 | 12.5 | 5.0 |
| 80+ | 85.3 | 5.4 | 9.3 |
| Goobta waraysiga | | | |
| Tuulo | 88.9 | 1.5 | 9.6 |
| Magaalo | 81.6 | 5.6 | 12.8 |
| Reer Guuraa | 94.4 | 0.2 | 5.4 |
| Wadar | 84.7 | 4.1 | 11.3 |

⁶Marka laga soo tago baasaboorka, noocyada kale ee ugu badan aqoonsiga ayaa ah ID kaarka iyo warqadaha dhalashada

3

WAXBARASHADA

Farriimo Muhiim ah:

- In ka badan kala bar bulshada ayaa wax qori kara oo akhrin kara (53.7%). Ragga ayaa heerka aqoonta uga sarreeya dumarka oo 63.6% iyo 45.3% ayay kala yihiin. Heerka qoridda iyo akhrinta dhalinyarada ayaa gaarsiisan 70.3%
- Ku dhawaad saddex meelood laba meel bulshada (65.5%) ayaan helin waxbarasho rasmi ah. Keliya 4% ayaa heer sare ka gaaray waxbarashada
- Guud ahaan Soomaaliya, keliya 25% carruurta da'doodu gaartay iskuulka ayaa waxbarashada aadda. Tirada dhigata dugsiyada sare ayaa hoos ugu dhacday 14.6%
- Inta badan ardayda (92.2%) dugsiyada hoose iyo (85.1%) dugsiyada sare ayaa u lugeeya goobahooda waxbarashada.



3.1 Gogol-dhig

Waxbarashada ayaa ah xuquuq asaasi ah isla markaana waxa ay sabab u noqotaa horumarka bulsho iyo dhaqaale ee mustaqbalka dalka. Cutubkan waxa uu diirradda saaray waxbarashada rasmiga ah ee ay hesho bulshada Soomaaliya, iyadoo la adeegsanayo tilmaamayaasha sida, qorista iyo akhriska, aaddida iskuullada, ku biiritaanka ardayda ee iskuullada, heerka ugu sarreeya ee laga gaaro waxbarashada iyo gaadiidka loo raaco iskuullada.

3.2 Qoridda iyo Akhrinta

ln ka badan kala bar bulshada ayaa wax qori kara oo akhrin kara (53.7%). Ragga ayaa heerka aqoonta uga sarreeya dumarka oo 63.6% iyo 45.3% ayay kala yihiin. Heerka qoridda iyo akhrinta ayaa u kala duwan da'da bulshada, iyadoo dhalinyarada ay yihiin kuwa ugu badan ee wax qori kara ama akhrin kara, halka dadka da'da ah aanay awooddin arrintaas. Heerka qoridda iyo akhrinta ayaa ku badan magaalooyinka (60.9%), halka tuulooyinka uu yahay (49.1%), reer guuraagana uu yahay (20.5%). Jadwalka 3.1 waxa ay muujinaysaa boqolleyda heerka qoridda iyo akhriska ee dadka 15 jirka ka weyn, iyagoo loo eegayo da'da, jinsiga iyo goobta waraysiga.

Jadwal 3.1: Heerka qoridda iyo akhriska ee dadka 15 jirka ka weyn, iyagoo loo eegayo da'da, jinsiga iyo goobta waraysiga, SIHBS 2022

| Tilmaamaha Da'da | Heerka Qoridda iyo Akhriska | | |
|---------------------|-----------------------------|--------|-------|
| | Lab | Dhedig | Wadar |
| 15-19 | 75.1 | 69.9 | 72.4 |
| 20-24 | 77.5 | 59.4 | 67.1 |
| 25-29 | 67.5 | 47.1 | 55.4 |
| 30-34 | 59.8 | 41.3 | 49.5 |
| 35-39 | 58.2 | 28.0 | 41.0 |
| 40-44 | 50.6 | 26.9 | 39.1 |
| 45-49 | 55.5 | 30.2 | 42.2 |
| 50-54 | 49.2 | 23.8 | 37.5 |
| 55-59 | 54.8 | 17.9 | 38.8 |
| 60-64 | 48.5 | 9.6 | 28.4 |
| 65-69 | 46.4 | 11.8 | 29.0 |
| 70-74 | 36.8 | 8.7 | 21.9 |
| 75-79 | 38.6 | 12.2 | 26.6 |
| 80+ | 38.1 | 5.3 | 20.6 |
| Dhalinyaro | | | |
| 15-24 | 76.0 | 65.5 | 70.3 |
| Goobta waraysiga | | | |
| Tuulo | 72.2 | 51.4 | 49.1 |
| Magaalo | 23.8 | 17.3 | 60.9 |
| Reer Guuraa | 61.7 | 48.4 | 20.5 |
| Wadar | 63.6 | 45.3 | 53.7 |

3.3 Heerka Waxbarashada


Jadwalka 3.2 waxa ay muujinaysa heerka waxbarashada ee bulshada Soomaaliyeed. Ku dhawaad saddex meelood laba meel (65.5%) bulshada Soomaaliya ma aanay helin waxbarasho rasmi ah. Dadka la waraystay ayaa badankood (17.3%) sheegay inay dhigteen qeyb kamid ah dugsiga hoose. Keliya 4.6% bulshada ayaa dhamaystay dugsiga sare, halka 4% ay gaareen waxbarashada heerka sare. Dhalinyarada ayaa u badan dadka waxbartay. Da'aadda 20-24 iyo 25-29 ayaa waxbarashada sare ka gaaray 14.2% iyo 12.2% sida ay u kala horreeyaan.

Dadka magaaloooyinka ku nool ayaa heer wanaagsan ka gaara waxbarashada marka loo eego kuwa tuulooyinka iyo reer guuraaga. Dadka reer guuraaga ah ayaa 92.5% waxa ay sheegeen in aanay helin waxbarasho rasmi ah, halka 68.6% kuwa ku nool tuulooyinka ay sidaas oo kale sheegeen. Keliya 3% dadka ku nool tuulooyinka ayaa dhamaystay waxbarashada dugsiga sare, halka 1.7% ay gaareen heerka sarre ee waxbarashadaas (Figure 5.1).

Jadwal 3.2: Heerka waxbarashada ee bulshada

| Heerka ugu sarreeya ee ay dadka da'doodu ka weyn tahay 6 jirka ay gaareen, iyadoo loo eegayo da'da iyo goobta waraysi, SIHBS 2022 | | | | | | | |
|---|-------------------------------|-------------------------|------------------------|------------------------|-----------------------|-----------------|-------|
| Tilmaamaha | Aan helin waxbarasho rasmi ah | Aan dhameyn Dugsi hoose | Dhammeeyay dugsi hoose | Aan dhameyn dugsi sare | Dhammeeyay dugsi sare | Waxbarasho sare | Wadar |
| Da'da | | | | | | | |
| 6-9 | 85.4 | 14.6 | | | | | 100.0 |
| 10-14 | 59.2 | 36.6 | 2.8 | 1.3 | 0.0 | 0.1 | 100.0 |
| 15-19 | 41.7 | 22.8 | 11.4 | 14.8 | 6.6 | 2.8 | 100.0 |
| 20-24 | 47.0 | 11.2 | 6.4 | 8.0 | 13.2 | 14.2 | 100.0 |
| 25-29 | 60.2 | 9.3 | 6.2 | 2.9 | 9.3 | 12.2 | 100.0 |
| 30-34 | 66.8 | 9.5 | 6.0 | 2.5 | 7.8 | 7.3 | 100.0 |
| 35-39 | 75.7 | 7.3 | 5.7 | 1.9 | 5.1 | 4.3 | 100.0 |
| 40-44 | 78.2 | 7.6 | 4.7 | 2.0 | 4.5 | 3.0 | 100.0 |
| 45-49 | 76.1 | 6.6 | 8.3 | 0.8 | 5.4 | 2.9 | 100.0 |
| 50-54 | 78.3 | 6.2 | 3.3 | 1.9 | 5.3 | 5.0 | 100.0 |
| 55-59 | 78.1 | 3.0 | 6.1 | 2.8 | 8.3 | 1.6 | 100.0 |
| 60-64 | 82.4 | 6.2 | 3.2 | 0.8 | 4.0 | 3.4 | 100.0 |
| 65-69 | 81.3 | 5.6 | 2.8 | 0.0 | 7.5 | 2.9 | 100.0 |
| 70-74 | 89.2 | 4.3 | 1.8 | 0.0 | 3.9 | 0.9 | 100.0 |
| 75-79 | 91.8 | 0.8 | 0.9 | 0.0 | 1.2 | 5.3 | 100.0 |
| 80+ | 90.5 | 3.0 | 3.1 | 0.0 | 2.5 | 0.9 | 100.0 |
| Goobta waraysiga | | | | | | | |
| Tuulo | 68.6 | 19.4 | 4.5 | 2.8 | 3.0 | 1.7 | 100.0 |
| Magaalo | 59.5 | 18.5 | 5.7 | 5.0 | 5.9 | 5.4 | 100.0 |
| Reer guuraa | 92.5 | 6.1 | 0.4 | 0.3 | 0.5 | 0.2 | 100.0 |
| Wadar | 65.5 | 17.3 | 4.8 | 3.9 | 4.6 | 4.0 | 100.0 |

Figure 5.1: Heerka waxbarashada marka loo eego goobta waraysiga



Jadwal 3.2a waxaa lagu soo bandhigay heerka waxbarashada ay ka gaareen ragga. Guud ahaan, shan meelood saddex kamid ah (60.6%) ma aanay heli waxbarasho rasmi ah, 18% waxa ay dhigteen qeyb kamid ah dugsiga hoose, 5.5% waxa ay dhamaysteen dugsiga hoose, halka 4.5% ay dhamaysteen dugsiga sare. Keliya 6.2% oo bulshada ragga ah ayaa sheegay inay heleen waxbarasho ka saraysa dugsiga sare.

Marka la eego wadarta bulshada, dhalinyarada ragga ah ee Soomaaliya (20 ilaa 34 jir) ayaa u muuqda inay yihiin kuwo gaaray waxbarashada ugu saraysa. 18.4% ragga da’doodu u dhexayso 25-29 ayaa wariyay inay gaareen heerka sare ee waxbarashada. Goob waraysi ahaan, ragga reer guuraaga ah ayaa ugu waxbarasho hooseeya (91.6%) marka la barbar dhigo kuwa magaalada (52.9%) halka kuwa tuulooyinka ay noqdeen (65.5%).

Jadwal 3.2a: Heerka waxbarashada ee bulshadda, Ragga

| Boqolleyda bulshada dumarka ah ee da’doodu ka weyn tahay 6 jirka iyo heerka ay ka gaareen waxbarashada, SIHBS 2022 | | | | | | | |
|--|-----------------------------|---------------------------|--------------------------|--------------------------|-------------------------|-----------------|-------|
| Tilmaamaha | Aan helin waxbasho rasmi ah | Aan dhameyn dugsiga hoode | Dhammeeyay dugsiga hoose | Aan dhameyn dugsiga sare | Dhammeeyay dugsiga sare | Waxbarasho sare | Wadar |
| Da'da | | | | | | | |
| 6-9 | 84.9 | 15.1 | | | | | 100.0 |
| 10-14 | 58.2 | 37.4 | 2.8 | 1.5 | | 0.1 | 100.0 |
| 15-19 | 38.2 | 23.5 | 12.4 | 16.0 | 7.2 | 2.8 | 100.0 |
| 20-24 | 37.4 | 10.1 | 7.2 | 10.6 | 16.8 | 17.8 | 100.0 |


| | | | | | | | |
|------------------|------|------|------|-----|------|------|-------|
| 25-29 | 48.0 | 8.8 | 7.4 | 3.4 | 14.0 | 18.4 | 100.0 |
| 30-34 | 54.6 | 8.9 | 7.7 | 2.7 | 13.9 | 12.2 | 100.0 |
| 35-39 | 62.2 | 7.1 | 8.9 | 3.2 | 9.6 | 9.0 | 100.0 |
| 40-44 | 71.7 | 7.9 | 5.8 | 2.8 | 7.1 | 4.7 | 100.0 |
| 45-49 | 67.6 | 8.0 | 10.0 | 1.3 | 7.9 | 5.3 | 100.0 |
| 50-54 | 71.2 | 7.2 | 4.0 | 2.3 | 7.7 | 7.6 | 100.0 |
| 55-59 | 68.3 | 3.7 | 8.4 | 4.3 | 12.9 | 2.3 | 100.0 |
| 60-64 | 69.4 | 9.8 | 5.4 | 1.5 | 7.6 | 6.2 | 100.0 |
| 65-69 | 79.7 | 0.8 | 3.5 | 0.0 | 9.9 | 6.1 | 100.0 |
| 70-74 | 81.8 | 5.0 | 3.2 | 0.0 | 8.2 | 1.8 | 100.0 |
| 75-79 | 85.0 | 1.5 | 1.6 | 0.0 | 2.2 | 9.7 | 100.0 |
| 80+ | 79.7 | 6.5 | 6.4 | 0.0 | 5.5 | 2.0 | 100.0 |
| Goobta waraysiga | | | | | | | |
| Tuulo | 65.5 | 19.8 | 5.3 | 3.1 | 4.3 | 2.1 | 100.0 |
| Magaalo | 52.9 | 19.5 | 6.6 | 5.7 | 7.9 | 7.4 | 100.0 |
| Reer guuraa | 91.6 | 6.9 | 0.5 | 0.5 | 0.5 | 0.0 | 100.0 |
| Wadar | 60.6 | 18.0 | 5.5 | 4.5 | 6.2 | 5.3 | 100.0 |

Jadwal 3.2b waxaa lagu soo bandhigay heerka waxbarashada ay gaareen dumarka. Bulshada dumarka Soomaaliyeed ayaa dhammaan qeybaha kala duwan waxbarasho ahaan ka hooseeya ragga (Figure 3.1). Tusaale ahaan, 69.9% dumarka ayaa sheegay in aanay helin waxbarasho rasmi ah, halka boqolleyda ragga ee sidaa weriyay ay tahay 60.6%.

Farqiga heerka waxbarashada ee ragga iyo dumarka ayaa aad u muuqda marka laga hadlayo dugsiga sare iyo jaamacadaha. Keliya 3.1% dumarka ayaa sheegay inay dhamaysteen dugsiga sare, halka ragga ay boqolleydaas ahayd 6.2%.

Waxaa intaa dheer in 2.7% dumarka ay sheegeen inay gaareen heer ka sarreeya dugsiga sare, halka raggana ay qiyaastaas ahayd 5.3%. Farqiga kale ayaa ah in dumarka ku nool magaalooyinka, tuulooyinka iyo kuwa reer guuraaga ah ay u kala duwan yihiin fursadaha waxbarasho. Tusaale ahaan, dumarka reer guuraaga ah ayaa ugu waxbarasho hooseeya (93.5%), halka kuwa magaalooyinka ee aan waxbaran ay gaareen (65.5%), kuwa tuulooyinkana (71.4%).

Figure 3.1: Heerka waxbarasho, iyadoo loo eegayo jinsiga



Jadwal 3.2b: Heerka waxbarashada bulshada, Dumarka

| Boqolleyda bulshada dumarka ah ee da'doodu ka weyn tahay 6 jirka iyo heerka ay ka gaareen waxbarashada, SIHBS 2022 | | | | | | | |
|--|-----------------------------|---------------------------|--------------------------|--------------------------|-------------------------|-----------------|-------|
| Tilmaamaha | Aan helin waxbasha rasmi ah | Aan dhameyn dugsiga hoode | Dhammeeyay dugsiga hoose | Aan dhameyn dugsiga sare | Dhammeeyay dugsiga sare | Waxbarasho sare | Wadar |
| Age group | | | | | | | |
| 6-9 | 85.9 | 14.1 | | | | | 100.0 |
| 10-14 | 60.2 | 35.8 | 2.7 | 1.1 | 0.1 | 0.1 | 100.0 |
| 15-19 | 44.8 | 22.2 | 10.5 | 13.7 | 6.0 | 2.8 | 100.0 |
| 20-24 | 54.2 | 12.1 | 5.8 | 6.0 | 10.5 | 11.5 | 100.0 |
| 25-29 | 68.5 | 9.5 | 5.4 | 2.6 | 6.0 | 8.0 | 100.0 |
| 30-34 | 76.6 | 10.0 | 4.7 | 2.4 | 2.9 | 3.4 | 100.0 |
| 35-39 | 86.0 | 7.5 | 3.2 | 0.9 | 1.6 | 0.8 | 100.0 |
| 40-44 | 85.0 | 7.4 | 3.5 | 1.2 | 1.8 | 1.1 | 100.0 |
| 45-49 | 83.7 | 5.3 | 6.8 | 0.3 | 3.2 | 0.7 | 100.0 |
| 50-54 | 86.7 | 5.1 | 2.4 | 1.4 | 2.6 | 1.9 | 100.0 |
| 55-59 | 90.9 | 2.1 | 3.0 | 0.9 | 2.4 | 0.7 | 100.0 |
| 60-64 | 94.8 | 2.8 | 1.1 | 0.1 | 0.5 | 0.7 | 100.0 |
| 65-69 | 82.7 | 9.9 | 2.2 | 0.0 | 5.3 | 0.0 | 100.0 |
| 70-74 | 95.8 | 3.6 | 0.6 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 100.0 |
| 75-79 | 100.0 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 100.0 |
| 80+ | 99.8 | 0.0 | 0.2 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 100.0 |
| Goobta waraysiga | | | | | | | |
| Tuulo | 71.4 | 19.1 | 3.8 | 2.6 | 1.8 | 1.4 | 100.0 |
| Magaalo | 65.5 | 17.7 | 4.9 | 4.3 | 4.0 | 3.7 | 100.0 |
| Reer guuraa | 93.5 | 5.3 | 0.3 | 0.2 | 0.5 | 0.3 | 100.0 |
| Wadar | 69.9 | 16.6 | 4.2 | 3.4 | 3.1 | 2.7 | 100.0 |

3.4 Dhigashada Iskuullada

Jadwalka 3.3 waxa uu muujinayaa heerka saxda ah ee dhigashada dugsiyada hoose iyo sare. Heer saxda ah ee dhigashada dugsiyada hoose (NAR) waxa lagu qiyaasaa bulshada rasmiga ah ee ardayda da'doodu u dhexayso 6 ilaa 13 jir, ee wax ka barta dugsiyada hoose.

25% carruurta gaartay da'da waxbarashada ayaa dhigta dugsiyada hoose ee Soomaaliya. Tiradaas ayaa aad isugu dhaw marka la eego magaalooyinka iyo tuulooyinka, hase yeeshee waxa ay aad u hooseysaa marka laga hadlayo carruurta reer guuraaga, oo ah 5.2%. Tani ayaa ka dhigan in tiro badan oo ah carruurta reer guuraaga aanay helin waxbarashada dugsiyada hoose marka la barbar

dhigo kuwa ku nool magaalooyinka iyo tuulooyinka. Heerka dhigashada iskuullada ayaa hoos ugu dhaca 14.6% marka la eego carruurta gaartay da'ada dugsiyada sare. Tiradaas ayaa xoogaa sarreysa marka la eego carruurta da'da dugsiyada sare gaartay ee ku nool magaalooyinka, isla markaana la babar dhigo kuwa ku nool tuulooyinka ama reer guuraaga ah.

Tirada carruurta aan da'da loo eegin ee ka diiwaangashan dugsiyada hoose iyo sare ee Soomaaliya Gross Attendance Ratio (GAR) ayaa kala ah 39.0% iyo 28.5%, taasoo ka sarraysa tirada Net Attendance Ratio (NAR). Tani ayaa muujinaysa in arday badan oo da'doodu weyn tahay ay dhigtaan dugsiyada hoose iyo sare.

Jadwal 3.3 Heerka dhigashada iskuullada

| Heerka da'da saxda ah (NAR) iyo heerka da'da guud (GAR) oo loo eegay jinsiga ardayda, farqiga jinsiga iyo goobta waraysiga, SIHBS, 2022 | | | | | | | | |
|---|---|--------|-------|------------------------------|---|--------|-------|------------------------------|
| | DUGSIGA HOOSE: Heerka da'da saxda ah (NAR) ¹ | | | | DUGSIGA HOOSE: Heerka da'da guud (GAR) ² | | | |
| Tilmaamaha | Lab | Dhedig | Wadar | Farqiga Jinsiga ³ | Lab | Dhedig | Wadar | Farqiga Jinsiga ³ |
| DUGSIGA HOOSE | | | | | | | | |
| Goobta waraysiga | | | | | | | | |
| Tuulo | 27.5 | 28.3 | 27.9 | 1.03 | 38.3 | 42.1 | 40.1 | 1.10 |
| Magaalada | 29.3 | 26.0 | 27.7 | 0.89 | 47.4 | 41.4 | 44.3 | 0.87 |
| Reer guuraaga | 6.3 | 4.1 | 5.2 | 0.64 | 11.5 | 8.5 | 10.1 | 0.74 |
| Wadar | 25.9 | 24.0 | 25.0 | 0.93 | 40.4 | 37.7 | 39.0 | 0.93 |
| DUGSIGA SARE | | | | | | | | |
| Goobta waraysiga | | | | | | | | |
| Tuulo | 10.3 | 13.1 | 11.8 | 1.27 | 21.7 | 21.1 | 21.4 | 0.98 |
| Magaalada | 18.8 | 16.7 | 17.7 | 0.89 | 40.1 | 30.2 | 35.0 | 0.75 |
| Reer guuraaga | 0.0 | 1.0 | 0.5 | 0.00 | 1.5 | 1.1 | 1.3 | 0.74 |
| Wadar | 14.9 | 14.3 | 14.6 | 0.96 | 31.9 | 25.3 | 28.5 | 0.79 |

¹Heerka NAR ee dugsiyada hoose waa boqolleyda bulshada da'da loogu talo galay waxbarashada hoose (6-13 jir) ee dhigta iskuullada. Heerka NAR ee dugsiyada sare waa boqolleyda bulshada da'da loogu talo galay waxbarashada sare (14-17 jir) ee dhigta iskuullada. NAR kama badan karo 100%.

²Heerka GAR ee dugsiyada hoose waa guud ahaan tirada ardayda dhigata iskuullada hoose oo laga dhigay boqolleyda ardayda ku dhigata da'da loogu talo galay. Heerka GAR ee dugsiyada sare waa guud ahaan tirada ardayda dhigata iskuullada sare oo laga dhigay boqolleyda ardayda ku dhigata da'da loogu talo galay. Haddii ay kala badan yihiin tirada ardayda da'da weyn iyo kuwa da'da saxda ah, markaas GAR-ku waxa uu ka badan karaa 100%.

³Tusaha Farqiga Jinsiga ee dugsiyada hoose waxa ay muujisaa NAR(GAR) ee dugsiyada hoose ee gabdhaha oo la barbar dhigay NAR(GAR) wiilasha. Tusaha Farqiga Jinsiga ee dugsiyada sare waxa ay muujisaa NAR(GAR) ee dugsiyada sare ee gabdhaha oo la barbar dhigay NAR(GAR) wiilasha.

3.5 Qaabka ay ardayda ku gaaraan iskuullada

Ardayda dhigata iskuullada hoose iyo sare ayaa badankood u lugeeya goobahooda waxbarashada, iyagoo ka taga xAAFADO kala duwan (jadwalka 3.4). 92.2% ardayda dugsiyada hoose ayaa u lugeeya iskuulladooda, halka 7.9% ay ku tagaan gaari ama mooto. Sidoo kale, ardayda dugsiyada sare ayaa 85.1% waxa ay u lugeeyaan goobahooda waxbarashada.

Jawdal 3.4: Qaabka ay ardayda ku gaaraan iskuullada

| Boqolleyda qaabka ay ardayda ku gaaraan iskuullada iyadoo loo eegayo goobta waraysiga, SIHBS 2022 | | | | |
|---|-------|---------|-------------|-------|
| Qaabka safarka | Tuulo | Magaalo | Reer guuraa | Wadar |
| Dugsiyada hoose | | | | |
| Socod/Lug | 99.0 | 89.6 | 93.9 | 92.2 |
| Baaskiil | 0.1 | 0.3 | 0.0 | 0.3 |
| Gaari khaas ah | 0.2 | 5.9 | 0.1 | 4.2 |
| Gaadiidka dadweynaha | 0.6 | 3.3 | 6.0 | 2.7 |
| Bajaj/Mooto khaas ah | 0.0 | 0.6 | 0.0 | 0.4 |
| Bajaj/Mooto dadweynaha | 0.1 | 0.4 | 0.0 | 0.3 |
| Nooc kale | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.0 |
| Wadar | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 |
| Dugsiyada sare | | | | |
| Socod/Lug | 98.3 | 82.7 | 100.0 | 85.1 |
| Baaskiil | 0.0 | 0.2 | 0.0 | 0.1 |
| Gaari khaas ah | 0.0 | 7.8 | 0.0 | 6.5 |
| Gaadiidka dadweynaha | 1.7 | 5.4 | 0.0 | 4.8 |
| Bajaj/Mooto khaas ah | 0.0 | 1.8 | 0.0 | 1.5 |
| Bajaj/Mooto dadweynaha | 0.0 | 2.2 | 0.0 | 1.9 |
| Wadar | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 |

4.1 Gogol-dhig

Sahanka SIHBS ayaa ururiyay xogta xaaladda caafimaadka ee bulshada. Cutubkan waxaa lagu soo bandhigay tilmaamaha caafimaadka guud, sida xanuunnada iyo dhaawaca, curyaannimada iyo cuddurada aan bixin, tegitaanka goobaha caafimaadka, meelaha ay ku yaallaan goobaha caafimaadka, gaadiidka lagu tago goobaha caafimaadka, cabitaanka sigaarka, xirashada maaskaraha iyo heerka tallaalka Covid-19. Xogta caafimaadka bulshada iyo helitaanka daryeel caafimaad ayaa muhiim u ah dejinta siyaasadaha, la socoshada Qorshaha Horumarinta Qaranka NDP9 iyo dedaallada caalamiga ah sida Yoolasha Horumar Waara (SGDs).

4.2 Xaaladda Caafimaad

Jadwalka 4.1 waxa uu muujinayaa xogta tirada dadka naafada ah, kuwa qaba xanuunnada aan bixin iyo dadka shilalka galay ee bulshada iyadoo loo eegayo jinsiga, da'da iyo goobta waraysiga. Marka si guud loo eego xaaladda caafimaad ee Soomaaliya, jadwalku waxa uu muujinayaa in 3.5% dadweynaha ay

4

CAAFIMAADKA,
SIGAAR CABIDDA &
TALLAALKA COVID-19**Farriimo Muhiim ah**

- Qeyb yar oo kamid ah bulshada (3.5%) ayaa sheegay inay xanuunsadeen ama shil galeen. 3.8% dadkaas waxa ay ahaayeen dumar, halka 3.2% ay ahaayeen rag. Xanuunnada ugu badan waxaa sheegtay dadka ku nool tuulooyinka (3.9%)
- Dadka qaba xanuunnada joogtada ah waxaa u badan kuwa uu ku dhacay dhiig karka (26.3%) iyo kuwa qaba macaanka/sokorta (21.1%).
- Qiyaastii 8.3% bulshada ayaa qabta nooc curyaannimo ah.
- 21.2% dadkaas qaba cudurrada joogta ah ama curyaannimada ayaa hela kaalmo.
- Dadka xanuunsan ama dhaawacma ayaa 44.1% waxa ay tagaan farmashiyayaasha, halkii ay ka aadi lahaayeen cisbitaallada. Ragga iyo dumarka ayaa wax xoogaa ku kala aragti duwan goobaha caafimaadka ay u doontaan.
- Kharash la'aan ayaa 48.5% dadka xanuunsan ama dhaawacma u sahli weyda inay tagaan xarumaha caafimaadka. 33.3% ayaa rumaysan in xanuunka uu ahaa mid yar, halka 4.6% ay sheegeen inay waayeen dhakhtar/kalkaaliso. Deegaannada ayaa ku kala duwan helitaanka daryeel caafimaad.
- 26.8% waxa ay dadku jecel yihiin inay tagaan goobaha caafimaad ee ugu dhaw, halka 36.0% ay aadaan xarumo caafimaad oo isla deegaankooda ah.
- 2.6% dadka ka weyn 15 jirka ayaa caba sigaarka, halka 0.1% ay dhuuqaan shiishad, iyadoo 2.5% ay cunaan khaadka. Ragga ayaa leh balwadahaas.
- Inta badan bulshada (79.4%) ayaan xiran mask todobadii maalmood ee u dambeeyay. Keliya 7.1% bulshada ayaa qaatay ugu yaraan hal qeyb oo kamid ah tallaalka Covid-19.



galeen shil ama uu ku dhacay xanuun, halka 8.3% ay qabaan nooc curyaannimo ah, iyadoo 4.2% ay la noolyihiin xanuunnada aan bixin.

Dumarka ayaa curyaannimada uga badan ragga oo waxa ay yihiin 8.8% halka ragguna yahay 7.8%. Goob waraysi ahaan marka la eego, tuulooyinka ayay ku badan yihiin dadka curyaanka ah (9.1%), halka magaalooyinka ay yihiin 8.2%, reer guuraagana 7.2%.

Jawdalka 4.1: Xaaladda caafimaadka

| Jiritaanka curyaannimada, xanuunnada aan bixin, iyo cudurrada kale SIHBS, 2022 | | | |
|--|-------------|----------------------|--------------------------|
| Tilmaamaha | Curyaannimo | Xannuunada aan bixin | Xanuunnada kale ama shil |
| Da'da | | | |
| 0-4 | 9.2 | 0.8 | 3.9 |
| 5-9 | 4.3 | 0.6 | 3.4 |
| 10-14 | 4.2 | 1.0 | 2.6 |
| 15-19 | 4.3 | 1.4 | 2.8 |
| 20-24 | 3.6 | 2.7 | 2.7 |
| 25-29 | 4.5 | 4.4 | 2.7 |
| 30-34 | 5.4 | 3.9 | 4.0 |
| 35-39 | 7.4 | 6.3 | 4.8 |
| 40-44 | 12.9 | 9.7 | 3.6 |
| 45-49 | 14.0 | 13.5 | 4.5 |
| 50-54 | 21.2 | 19.8 | 6.5 |
| 55-59 | 22.9 | 19.4 | 4.1 |
| 60-64 | 32.7 | 24.4 | 5.6 |
| 65-69 | 41.2 | 27.9 | 6.4 |
| 70-74 | 56.9 | 29.9 | 7.1 |
| 75-79 | 58.6 | 38.9 | 9.3 |
| 80+ | 65.5 | 32.9 | 5.6 |
| Goobta waraysiga | | | |
| Tuulo | 9.1 | 3.8 | 3.9 |
ay 21.7% shaqooyin haysteen, bulshadaas oo 32.9% kamid ah ay yihiin rag, halka 12.2% ay yihiin dumar.

Heerka shaqaalaha diyaarsan oo ah 25.9% ayaa muujinaya in afar meelood oo meel bulshada gaartay da'da shaqada ay yihiin kuwo shaqeysa ama shaqo raadis ah. Tiradaas waxaa u badan ragga oo ah 38.4%, halka dumarkana ay yihiin 15.3%.

Jadwalka 7.1 waxa uu muujinaya saamiga shaqaalaha aan shaqeyn - kuwaas oo diyaar u ah inay shaqeeyaan, isla markaana shaqo doon ah. Waxaa qeybtaas loo yaqaanaa heerka shaqo la'aanta, waana 16.3%. Heerka shaqo la'aanta ayaa ku badan magaalooyinka (19.3%), marka la barbar dhigo tuulooyinka iyo reer guuraaga (oo kala ah 10.6% iyo 5.4%). Heerka shaqo la'aanta ragga ayaa ah 14.3%, halka dumarkana ay tahay 20.6%, halka heerka shaqo la'aanta ee dhalinyarada ay tahay 30.1%, taasoo ku badan dumarka 32.0% marka la barbar dhigo ragga 29.0%.

Jadwal 7.1. Xogta shaqada ee bulshada gaartay da'da shaqaaleysiinta

| Tilmaamaha | Heerka shaqeynta (%) | Heerka ka qeyb qaadashada shaqaalaha (%) | Heerka shaqa la'aanta (%) | Heerka shaqa la'aanta dhalinyarada (%) |
|--|----------------------|--|---------------------------|--|
| Goobta waraysiga | | | | |
| Tuulo | 24.9 | 27.8 | 10.6 | 21.8 |
| Magaalo | 22.1 | 27.3 | 19.3 | 35.6 |
| Reer guuraa | 13.2 | 14.0 | 5.4 | 5.5 |
| Jinsiga | | | | |
| Dhedig | 12.2 | 15.3 | 20.6 | 32.0 |
| Lab | 32.9 | 38.4 | 14.3 | 29.0 |
| Wadar | 21.7 | 25.9 | 16.3 | 30.1 |
| Fiiro gaar ah: Shaqo la'aanta dhalinyarada ayaa lagu saleeyay da'da u dhexaysa 15 ilaa 24 jir. | | | | |

7.3 Heerarka Shaqooyinka iyo Noocyadooda

Jadwalka 7.2 waxa uu muujinayaa noocyada bulshada shaqeysa iyadoo loo eegayo jinsiga iyo deegaannada ay ku noolyihiin. 26.5% dadka shaqeeya ee bulshada Soomaaliyeed ayaa ka hawlgala xafiisyada, halka 25.6% ay hayaan shaqooyin xirfadeysan. Waxaa badan ragga qabta hawlaha xirfadda u baahan marka la barbar dhigo dumarka. 16.0% dumarka ayaa qabtay shaqooyinka hoose. Waxaa kooban dumarka qabta shaqooyinka farsamada u baahan sida beeraha, keymaha iyo kalluumaysiga. Shaqooyinka xafiisyada iyo kuwa xirfadda u baahan ayaa ah noocyada ugu badan ee ay dadku ka qabtaan deegaannada kala duwan.

Jadwal 7.2: Bulshada shaqeysa iyo shaqooyinka ugu waaweyn

| Boqolleyda bulshada da'doodu ka weyn tahay 15 jir ee haatan shaqeysa, shaqooyinka ugu waaweyn, jinsiga iyo goobta waraysiga | | | | | | | | | | | | |
|---|-------|--------|-------|---------|--------|-------|-------------|--------|-------|-------|--------|-------|
| Shaqooyinka | Tuulo | | | Magaalo | | | Reer guuraa | | | Wadar | | |
| | Lab | Dhedig | Wadar | Lab | Dhedig | Wadar | Lab | Dhedig | Wadar | Lab | Dhedig | Wadar |
| Maamulayaal | 12.2 | 13.2 | 12.5 | 8.8 | 11.7 | 9.8 | 15.3 | 1.9 | 11.7 | 10.1 | 11.6 | 10.6 |
| Xirfadlayaal | 21.9 | 22.6 | 22.1 | 28.5 | 26.6 | 27.9 | 13.7 | 14.2 | 13.8 | 25.8 | 25.0 | 25.6 |
| Farsamo yaqaanno/ xirfadlayaal | 7.7 | 12.3 | 8.9 | 10.6 | 10.8 | 10.7 | 3.5 | 5.4 | 4.0 | 9.4 | 10.9 | 9.8 |
| Shaqooyinka xafiisyada (karaani) | 26.3 | 19.8 | 24.5 | 28.0 | 27.1 | 27.7 | 17.5 | 32.1 | 21.4 | 26.9 | 25.7 | 26.5 |
| Shaqaalaha iib geynta/adeegyada | 10.9 | 13.6 | 11.6 | 5.2 | 4.9 | 5.1 | 11.9 | 8.4 | 11.0 | 7.1 | 7.1 | 7.1 |
| Xirfadlayaal beeraha, kalluunka iyo keymaha | 5.0 | 4.5 | 4.9 | 1.1 | 0.5 | 0.9 | 10.9 | 3.0 | 8.8 | 2.8 | 1.6 | 2.4 |
| Farshaxanka iyo hawlahda la xiriira | 1.4 | 1.2 | 1.3 | 2.7 | 2.0 | 2.5 | 0.0 | 3.1 | 0.8 | 2.2 | 1.9 | 2.1 |
| Shaqaalaha warshadaha iyo dayactirka qalabka | 1.2 | 0.0 | 0.9 | 2.4 | 0.2 | 1.7 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 1.9 | 0.2 | 1.4 |
| Shaqooyinka fudud | 13.5 | 12.7 | 13.3 | 12.6 | 16.0 | 13.7 | 27.2 | 31.9 | 28.5 | 13.7 | 16.0 | 14.4 |
| Wadar | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 |

7.4 Dadka shaqeeya iyo hawlaha ay qabtaan

Shaqooyinka adeegga macaamiisha (18.7%) ayaa ah kuwa ugu badan ee ay sheegteen dadka shaqeeya ee lagu waraystay sahanka, iyadoo ay tiro ahaan siman yihiin ragga iyo dumarka ka shaqeeya qeybahaas. Nooca xiga ayaa ah xirfadlayaasha maamula ganacsiyada, waxaana ka shaqeeya 10.1% guud ahaan bulshada shaqeysa.

Deegaannada reer guuraaga, 10.4% ayaa ka shaqeeya beeraha, waxaana badan dumarka 18.9% marka la barbar dhigo ragga 7.1%. Shaqaalaha magaalooyinka ayaa u badan kuwa adeegga macaamiisha (20.9%), halka 0.6% ay qabtaan hawlaha beeraha, keymaha iyo kalluumaysiga. Dadka ku nool tuulooyinka ayaa inta badan qabta shaqooyinka adeegga macaamiisha (14.5%) iyo shaqooyinka adeegyada gaarka ah (10.7%).

Jadwal 7.3: Boqolleyda bulshada da'doodu ka weyn tahay 15 jirka ee hadda shaqeeya iyo shaqooyinkooda, jinsiga, goobta waraysiga


| Shaqada | Tuulo | | | Magaalo | | | Reer guuraa | | | Wadar | | |
|--|-------|--------|-------|---------|--------|-------|-------------|--------|-------|-------|--------|-------|
| | Lab | Dhedig | Wadar | Lab | Dhedig | Wadar | Lab | Dhedig | Wadar | Lab | Dhedig | Wadar |
| Madaxda maamulka, Saraakiil sare iyo xildhibaan | 0.6 | 0.0 | 0.4 | 0.5 | 0.1 | 0.4 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.5 | 0.0 | 0.4 |
| Maamulayaasha ganacsiga | 1.4 | 0.1 | 1.1 | 2.7 | 1.6 | 2.4 | 0.5 | 0.0 | 0.3 | 2.2 | 1.2 | 1.9 |
| Maamulayaasha wax soo saarka/ adeegyada gaarka ah | 4.4 | 2.9 | 3.9 | 3.2 | 4.5 | 3.6 | 10.7 | 1.4 | 8.1 | 4.0 | 4.0 | 4.0 |
| Maamulayaasha dalxiiska, ganacsiyada tafaariiqda/ adeegyada kale | 5.5 | 9.8 | 6.7 | 2.4 | 6.0 | 3.5 | 4.1 | 0.4 | 3.1 | 3.3 | 6.6 | 4.3 |

| | | | | | | | | | | | | |
|---|------|------|------|------|------|------|------|------|------|------|------|------|
| Xirfadlayaasha sayniska iyo injineernimada | 1.6 | 0.0 | 1.2 | 2.4 | 0.0 | 1.6 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 2.0 | 0.0 | 1.4 |
| Hawladeennada caafimaadka | 1.1 | 3.6 | 1.8 | 3.3 | 4.4 | 3.7 | 1.3 | 2.4 | 1.6 | 2.6 | 4.1 | 3.0 |
| Macallimiinta | 8.8 | 3.2 | 7.3 | 9.9 | 4.9 | 8.3 | 4.4 | 0.5 | 3.3 | 9.3 | 4.3 | 7.7 |
| Xirfadlayaasha maamulka ganacsiga | 6.5 | 13.1 | 8.3 | 9.2 | 14.3 | 10.9 | 6.8 | 13.2 | 8.6 | 8.4 | 14.0 | 10.1 |
| Xirfadlayaasha isgaarsiinta iyo tiknoolajiyadda | 0.3 | 0.0 | 0.3 | 1.4 | 0.8 | 1.2 | 0.1 | 0.0 | 0.1 | 1.0 | 0.6 | 0.9 |
| Xirfadlayaasha sharciga, dhaqanka iyo bulshada | 4.1 | 2.6 | 3.7 | 2.6 | 2.1 | 2.4 | 0.9 | 1.5 | 1.1 | 2.9 | 2.2 | 2.7 |
| Xirfadlayaasha hoose ee sayniska iyo injineernimada | 1.1 | 0.8 | 1.0 | 1.8 | 0.2 | 1.3 | 0.5 | 0.0 | 0.3 | 1.5 | 0.3 | 1.2 |
| Hawladeennada hoose ee caafimaadka | 0.1 | 2.0 | 0.6 | 1.0 | 1.3 | 1.1 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.7 | 1.4 | 0.9 |
| Xirfadlayaasha hoose ee maamulka ganacsiga | 2.7 | 4.6 | 3.2 | 4.2 | 7.7 | 5.3 | 2.1 | 5.0 | 2.9 | 3.7 | 6.8 | 4.6 |
| Xirfadlayaasha hoose ee sharciga, dhaqanka iyo bulshada | 2.7 | 3.9 | 3.1 | 1.9 | 1.4 | 1.7 | 1.6 | 1.5 | 1.6 | 2.1 | 2.0 | 2.1 |
| Farsamo yaqaannada isgaarsiinta | 0.9 | 0.6 | 0.9 | 1.5 | 0.3 | 1.1 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 1.3 | 0.4 | 1.0 |
| Karaaniyadda guud | 6.7 | 5.5 | 6.4 | 4.9 | 5.6 | 5.1 | 4.7 | 1.4 | 3.8 | 5.4 | 5.3 | 5.4 |
| Shaqaalaha adeegga macaamiisha | 16.0 | 10.5 | 14.5 | 21.3 | 19.9 | 20.9 | 7.8 | 24.1 | 12.3 | 19.1 | 17.9 | 18.7 |
| Karaaniyadda xogta diiwaangeliya | 0.4 | 0.3 | 0.4 | 0.1 | 0.0 | 0.1 | 0.0 | 1.0 | 0.3 | 0.2 | 0.1 | 0.2 |
| Shaqaalaha kale ee hoose | 3.4 | 3.9 | 3.5 | 2.3 | 1.5 | 2.1 | 4.7 | 3.7 | 4.5 | 2.8 | 2.2 | 2.6 |
| Shaqaalaha adeegyada gaarka ah | 10.4 | 11.4 | 10.7 | 3.9 | 4.2 | 4.0 | 11.9 | 8.0 | 10.8 | 6.2 | 6.1 | 6.1 |
| Shaqaalaha iib geynta | 0.0 | 2.3 | 0.6 | 0.8 | 0.6 | 0.7 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.5 | 0.9 | 0.6 |
| Shaqaalaha daryeelka gaarka ah | 0.2 | 0.0 | 0.2 | 0.2 | 0.0 | 0.1 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.2 | 0.0 | 0.1 |
| Shaqaalaha adeegyada amniga | 0.2 | 0.0 | 0.1 | 0.1 | 0.1 | 0.1 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.1 | 0.1 | 0.1 |
| Shaqaalaha beeraha ee suuqa fahansan | 1.4 | 1.1 | 1.3 | 0.3 | 0.2 | 0.3 | 3.0 | 0.0 | 2.1 | 0.7 | 0.4 | 0.6 |

| | | | | | | | | | | | | |
|--|-------|-------|-------|-------|-------|-------|-------|-------|-------|-------|-------|-------|
| Shaqaalaha kalluunka iyo keymaha ee suuqa fahansan | 0.4 | 0.2 | 0.3 | 0.2 | 0.1 | 0.2 | 5.2 | 0.0 | 3.7 | 0.6 | 0.1 | 0.4 |
| Beeraleyda, kalluumaysa, ugaarsata yaryar | 3.2 | 3.2 | 3.2 | 0.6 | 0.1 | 0.4 | 2.6 | 2.9 | 2.7 | 1.4 | 1.0 | 1.3 |
| Shaqaalaha dhismaha (aanay ku jirin kuwa korontada) | 0.8 | 0.3 | 0.7 | 1.0 | 0.4 | 0.8 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.9 | 0.4 | 0.7 |
| Shaqaalaha birta iyo qalabka kale | 0.4 | 0.0 | 0.3 | 0.4 | 0.2 | 0.3 | 0.0 | 2.9 | 0.8 | 0.4 | 0.3 | 0.3 |
| Shaqaalaha farsamada gacanta iyo daabacaadda | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.1 | 0.0 | 0.1 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.1 | 0.0 | 0.0 |
| Shaqaalaha alaabaha korontada | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.6 | 0.0 | 0.4 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.4 | 0.0 | 0.3 |
| Shaqaalaha cunno sameynta, dharka iyo farshaxanka kale | 0.1 | 1.6 | 0.5 | 0.6 | 1.3 | 0.8 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.4 | 1.3 | 0.7 |
| Shaqaalaha warshadaha qalabka | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.1 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.0 |
| Darawallada gaadiidka xamuulka ah | 1.3 | 0.0 | 0.9 | 2.3 | 0.2 | 1.6 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 1.9 | 0.2 | 1.4 |
| Shaqaalaha nadaafadda | 0.0 | 2.4 | 0.7 | 1.0 | 6.6 | 2.8 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.7 | 5.2 | 2.1 |
| Muruq-maalka beeraha, kalluunka iyo keymaha | 5.0 | 3.1 | 4.5 | 0.8 | 0.3 | 0.6 | 7.1 | 18.9 | 10.4 | 2.3 | 1.9 | 2.2 |
| Muruq-maalka dhismaha, warshadaha iyo gaadiidka | 4.6 | 0.0 | 3.3 | 4.6 | 1.2 | 3.5 | 9.6 | 0.0 | 7.0 | 4.9 | 0.8 | 3.7 |
| Kaaliyayaasha diyaarinta cunnada | 0.0 | 3.4 | 0.9 | 0.2 | 0.4 | 0.2 | 0.2 | 0.0 | 0.1 | 0.1 | 1.1 | 0.4 |
| Shaqaalaha wadooyinka wax ku iibiya | 0.0 | 0.6 | 0.2 | 0.4 | 1.2 | 0.6 | 1.3 | 0.0 | 0.9 | 0.3 | 1.0 | 0.5 |
| Shaqaalaha qashinka iyo hawlaha hooseeya | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.1 | 0.3 | 0.1 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.0 | 0.2 | 0.1 |
| Adeegyada kale/hawlaha caawinta (Darawallada, shaqaalaha dukaamada, xoogsatada iwm.) | 3.3 | 3.2 | 3.3 | 5.4 | 5.9 | 5.6 | 8.8 | 11.2 | 9.5 | 5.0 | 5.5 | 5.2 |
| Wadar | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 |

Lahaanshaha dhulka iyo isticmaalkiisaFigure 7.1 waxa uu muujinayaa qoysaska leh dhulka. Guud ahaan 23.3% qoysaska ayaa leh isla markaana isticmaala dhulka. Qoysaska dhulka leh ayaa u badan magaalooyinka iyo tuulooyinka (22.8% iyo 30.5% sida ay u kala horreeyaan), halka reer guuraaga ay 11.0% leeyihiin dhulka.

Figure 7.1: Qoysaska dhulka leh



Dhulka ayaa intiisa badan loo isticmaalaa deegaan ahaan (74.8%), halka midka beeraha laga dhigo uu yahay 20.9%. Keliya 2.4% dhulka ayaa loo isticmaalaa dhaqashada xoolaha, halka 3.5% loo adeegsado arrimo ganacsi. Dadka ku nool magaalooyinka iyo tuulooyinka ayaa inta badan deegaan ahaan u isticmaala dhulkooda (79.6% iyo 70.3%), halka reer guuraaga ay 74.8% dhulkooda ka dhigtaan beero. (Jadwalka 7.4)

Jadwal 7.4: Isticmaalka Dhulka

| Boqolleyda dhulka hadda la isticmaalo iyo tilmaamihiisa | | | | |
|---|---------|-------|----------------|---------|
| Tilmaamaha | Deegaan | Beero | Xoolo dhaqasho | Ganacsi |
| Goobta waraysiga | | | | |
| Tuulo | 70.3 | 29.2 | 2.0 | 1.9 |
| Magaalo | 79.6 | 13.5 | 2.4 | 4.7 |
| Reer guuraa | 57.1 | 40.0 | 4.7 | 0.8 |
| Wadar | 74.8 | 20.9 | 2.4 | 3.5 |

Jadwalka 7.5 waxa uu muujinaya milkiilayaasha dhulka Soomaaliya oo loo eegay jinsiga, deegaanka iyo in dhulka loo isticmaalay deegaan ahaan ama beero, iyo weliba tirada shakhsiyaadka wadaaga milkiyadda boosaska. Dadka gaarka ah ee leh dhulka ayaa 87.4% waxa ay u isticmaalaan deegaan ahaan, halka 83.2% ay ka dhigtaan beero. Halka 9.1% boosaska laga dhigay guryaha iyo 12.3% dhulka loo asteeyay beeraha ay isla leeyihiin laba qof. Keliya 3.5% dhulka deegaanka ah iyo 4.5% dhul

beereedka ayaa waxaa milkiyadooda wadaaga in ka badan laba qof.

Ragga ayaa ah kuwa ugu badan ee sida gaarka ah u leh dhulka, waxaana farqiga jinsiga uu ku xooggan yahay dhul beereedka (oo ay 71.0% raggu shakhsi ahaan u leeyihiin) marka la barbar dhigo dhulka deegaanka ah (oo ay 61.7% raggu shakhsi ahaan u leeyihiin). Sidoo kale farqiga jinsiga ayaa ku xooggan reer guuraaga oo ragga ayaa 72.2% leh dhulka deegaanka ah iyo 72.9% dhul beereedka.

Jadwal 7.5 Lahaanshaha dhulka iyo xuquuqda isticmaalka

| Dhulka deegaanka ah: | Tuulo | Magaalo | Reer guuraa | Wadar |
|---|-------|---------|-------------|-------|
| Celcelis ahaan tirada dadka leh boos dhul ah: | | | | |
| 1 qof | 89.2 | 85.8 | 95.4 | 87.4 |
| 2 qof | 9.1 | 9.6 | 2.7 | 9.1 |
| 3-12 qof | 1.7 | 4.6 | 1.9 | 3.5 |
| Jinsiga shakhsiyaadka gaarka u leh dhulka | | | | |
| Lab | 62.7 | 60.3 | 72.2 | 61.7 |
| Dhedig | 37.3 | 39.7 | 27.8 | 38.3 |
| Jinsiga shakhsiyaadka wadaaga milkiyadda dhulka | | | | |
| Lab | 50.0 | 47.5 | 54.8 | 48.4 |
| Dhedig | 50.0 | 52.5 | 45.2 | 51.6 |
| Dhul beereed | | | | |
| Celcelis ahaan tirada dadka leh boos dhul ah: | | | | |
| 1 qof | 82.6 | 83.8 | 83.5 | 83.2 |
| 2 qof | 12.8 | 10.8 | 14.9 | 12.3 |
| 3-12 qof | 4.6 | 5.4 | 1.7 | 4.5 |
| Jinsiga shakhsiyaadka gaarka u leh dhulka | | | | |
| Lab | 75.1 | 64.8 | 72.9 | 71.0 |
| Dhedig | 25.0 | 35.2 | 27.1 | 29.0 |
| Jinsiga shakhsiyaadka wadaaga milkiyadda dhulka | | | | |
| Lab | 52.9 | 57.4 | 44.3 | 53.5 |
| Dhedig | 47.1 | 42.6 | 55.7 | 46.5 |

8

GANACSIYADA QOYSKA EE AAN BEERAHA AHAYN IYO DAKHLIGA SHAKHSIYAADKA

Farriimo Muhiim ah:

- Keliya 15.8% qoysaska ayaa sanadkii la soo dhaafay lahaa ganacsi u gaar ah. Dadka magaaloooyinka ku nool ayaa u badan qoysaska ganacsiga leh (18.0%), tuulooyinka (16.9%) halka reer guuraagana ay 3.2% qoysasku leeyihiin ganacsi u gaar ah.
- Guud ahaan, waxaa badan dumarka leh ganacsiyada u gaarka marka la barbar dhigo ragga. Dumarka ganacsatada ayaa ah 56.7%, halka ragguna ay yihiin 35.4%. Ganacsiyada ay dumarka iyo ragga isla leeyihiin ayaa ah 7.9%
- Heer qaran, ganacsiyada ugu badan ee ay qoysaska leeyihiin ayaa ah bagaashka lagu iibiyo wadooyinka iyo suuqyada (37.2%), halka ganacsiyada gaari dhaqidda, biraha, makaaniga, nijaarnimada, harqaanka iyo jimo jaraha ay yihiin (23.4%)
- Diiwaangelinta ganacsiyada marka loo eego deegaannada ayaa ah kala ah 34.7%, 16.5% iyo 6.6%. Waxay u badan tahay in qoysaska magaalada ay ganacsiyadooda diiwaangeliyaan 43.3%
- Dumarka ayaa inta badan leh (54.9%) waxa lagu qabanayo lacagaha ka soo baxa ganacsiga marka loo eego ragga (32.1%).




8.1 Gogol-dhig

Cutubkan waxa uu soo bandhigay macluumaadka ganacsiyada aan beeraha ku tiirsaneyn, iyo dakhliga shakhsiyaadka si loo cabirro dakhliga laga helay ganacsiyadaas. Waxaa sidoo kale ku xusan xog khuseysa lahaanshaha ganacsiyada qoyska, xarumaha ay ku shaqeeyaan, qaabka lahaansha, noocyada dadka ka shaqeeya ganacsiga qoyska, dhaqaalaha iyo faa'iidada laga helo iyo sida ay xubnaha qoyska uga qeyb qaataan ganacsiga iyadoo loo eegayo jinsigooda.

8.2 Lahaanshaha Ganacsiga Qoyska

Keliya 15.8% qoysaska Soomaaliya ayaa sanadkii ugu dambeeyay ka shaqeeyay ganacsi ay leeyihiin (figure 8.1). Heerka lahaanshaha ganacsiga ayaa ku badan magaalooyinka (18.0%), waxaa ku xiga tuulooyinka (16.9%), halka kuwa reer guuraaga uu yahay 3.2%.

Figure 8.1: Boqolleyda qoysaska ka shaqeeyay ganacsigooda sanadkii u dambeeyay



8.3 Saamiga noocyada ganacsiga qoysaska oo loo eegay deegaannada

Jadwalka 8.1 waxa uu muujinayaa noocyada ganacsiyada ay qoysasku maareeyeen sanadkii ka horreeyay xilliga la sameeyay sahankan. Guud ahaan dalka, nooca ugu badan ee ganacsiyada qoyska ayaa 37.2% ah baayac-mushtarka laga sameeyay wadooyinka ama suuqyada. Waxaa soo saara dukaamada, sida kuwa gawaarida lagu dhaqo, kuwa birta, makaakinada, nijaarka, harqaanlaha, jimo jaraha, iw. (kuwaa soo ah 23.4%)


Jadwal 8.1: Saamiga noocyada ganacsiga qoyska marka loo eego deegaannada

| Nooca ganacsiga | Tuulo | Magaalo | Reer guuraa | Wadar |
|--|-------|---------|-------------|-------|
| Dukaamo, sida meelaha gawaarida lagu dhaqo, farsamada biraha, makaaniga, nijaarka, harqaanka, timo jaraha iwm. | 24.5 | 23.4 | 11.6 | 23.4 |
| Hagaajinta miraha iyo wax soo saarka xoolaha si loo iibiyo | 1.3 | 3.1 | 13.1 | 2.9 |
| Leh ganacsi ku yaalla wadooyinka ama suuqyada | 41.5 | 36.1 | 20.7 | 37.2 |
| Bixiya adeegyada, ama alaab ku wareejiya wadooyinka | 1.4 | 3.4 | 27.2 | 3.4 |
| Leh xafiis, sida dhakhtarka, xisaabiyaha, qareenka, iwm | 3.5 | 1.9 | 0.2 | 2.3 |
| Darawal ka ah gaari taxi (kiro ama lahaansho), mooto, bajaaj ama gaari xamuul | 5.0 | 8.7 | 0.0 | 7.4 |
| Leh maqaayad ama miis cunnada lagu iibiyo | 12.7 | 5.4 | 19.5 | 7.8 |
| Aan kor lagu xusin | 10.2 | 18.1 | 7.7 | 15.6 |
| Wadar | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 |

8.4 Noocyada ganacsiga qoyska oo loo eegay jinsiga

Guud ahaan, dumarka ayaa u badan lahaansha ganacsiyada marka la barbar dhigo ragga. Saamiga guud ee lahaanshaha ganacsiyada ee gaarka loo leeyahay ayaa kala ah 56.7% dumar iyo 35.4% rag, halka 7.9% ganacsiyada ay shirkad ku yihiin labada jinsi (figure 8.2). Dumarka ugu badan ee ganacsiyada leh ayaa ku nool magaalooyinka iyo tuulooyinka, halka ragga iyo dumarka ganacsiyada leh ay tiro ahaan aad isugu dhaw yihiin deegaannada reer guuraaga (44.1% ragga iyo 44.2% dumarka).

Figure 8.2: Jinsiga shakhsiyaadka leh ganacsiyada iyo deegaankooda



8.5 Go'aannada ku aaddan dakhliga iyo maareynta ganacsiga qoyska

Lahaanshaha ganacsiga ayaa u muuqda mid ay ku lammaan tahay awoodda go'aan qaadashada sida loo isticmaalayo dakhliga iyo maareynta ganacsiga, iyadoo saddexdaas arrimood ay muujinayaan farqiga u dhexeeya jinsiga. Dumarka ayaa 54.9% qaata go'aannada waxa lagu sameynayo dhaqaalaha ka soo xarooda ganacsiga, halka ragguna ay qaataan 32.1% go'aannadaas. Marka deegaan ahaan loo eego dumarka gaara go'aannada ganacsiga, waxaa ay 56.8% ku nool yihiin magaalooyinka, 57.0% tuulooyinka, halka kuwa reer guuraaga ay yihiin 44.4% (Table 8.2).

Jadwal 8.2: Lahaanshaha iyo go'aan ka gaaridda isticmaalka dakhliga iyo maareynta ganacsiga qoyska

| Go'aanka | Tuulo | Magaalo | Reer guuraa | Wadar |
|---|-------|---------|-------------|-------|
| Milkiyadda ganacsiga | | | | |
| Lab | 31.7 | 36.5 | 44.1 | 35.4 |
| Dhedig | 58.2 | 56.5 | 44.2 | 56.7 |
| Labaduba | 10.0 | 7.0 | 11.8 | 7.9 |
| Go'aan ka gaaridda isticmaalka dakhliga | | | | |
| Lab | 27.7 | 33.1 | 55.6 | 32.1 |
| Dhedig | 55.8 | 54.9 | 44.2 | 54.9 |
| Labaduba | 16.5 | 12.0 | 0.2 | 13.0 |
| Go'aan gaaridda maareynta ganacsiga | | | | |
| Lab | 32.6 | 35.8 | 55.6 | 35.4 |
| Dhedig | 57.0 | 56.8 | 44.4 | 56.6 |
| Labaduba | 10.4 | 7.4 | 0.0 | 8.1 |
| Wadar | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 |

8.6 Diiwaangelinta Ganacsiyada Qoyska

Dowladda Federaalka ee Soomaaliya ayaa waxa ay waajib ka dhigtay in ganacsi kasta, heerka uu doono ha ahaadee, loo sameeyo diiwangelin/shati, ka hor inta aanu hawlgelin, si ganacsigaas uu u ilaaliyo shuruucda dalka, sida bixinta canshuuraha. Jadwalka 8.3 waxa uu muujinayaa in 34.7% ganacsiyada Soomaaliya ay diiwaangashan yihiin. Ganacsiyada tuulooyinka ayaa 16.5% diiwaangashan, halka kuwa reer guuraagana ay 6.6% diiwaangashan yihiin. Hase yeeshee, ganacsiyada qoysaska ku nool magaalooyinka ayay 43.3% u badan tahay in la diiwaangeliyo.

Jadwal 8.3: Da'da, xajmiga iyo diiwaangelinta ganacsiga qoyska


| | Tuulo | Magaalo | Reer guuraa | Wadar |
|-----------------------------------|-------|---------|-------------|-------|
| Inta sano ee uu furnaa | 4.6 | 4.7 | 3.9 | 4.6 |
| Bilaha uu shaqeeyay sanadkii hore | 11.5 | 11.3 | 12 | 11.3 |
| La diiwaangeliyay (%) | 16.5 | 43.3 | 6.6 | 34.7 |

8.7 Noocyada shaqaalaha ganacsiga qoyska

Guud ahaan dalka, 57.2% ganacsiyada qoysaska waxaa ka shaqeeya hal qof, 24.4% waxaa ka shaqeeya laba qof, 7.2% waxaa ka shaqeeya saddex qof, halka 11.2% ay ka shaqeeyaan dad ka badan saddex qof Figure 8.4¹¹. Ganacsiyada qoysaska ee ku yaalla tuulooyinka ayaa u badan 36.8% kuwo ay ka shaqeeyaan laba qof, marka la barbar dhigo kuwa magaalooyinka.

¹¹ Lama xusin natijada reer guuraaga, maadaama dad aad u kooban ay ka jawaabeen su'aashan.

Figure 8.4: Shaqaalaha ganacsiyada qoyska oo ay kamid yihiin xubnaha qoyska



9

SUGNAANTA CUNNADA
IYO DHIBAATOYINKA**Farriimo Muhiim ah:**

- In ka badan kala bar qoysaska (52.2%) ayaan helin cunno nafaqo iyo caafimaad leh bishii ka horreysay sahanka. 34.9% ayaa dareemay gaajo, halka 27.1% ay maalintii oo dhan hal gelin wax cuni jireen.
- Jiritaanka heerarka “dhexdhexaadka ama ba’an” ee sugnaan la’aanta cunnada sida lagu sheegay Miisaanka Sugnaan La’aanta Cunnada (FIES) ee guud ahaan bulshada Soomaaliya ay ah 44.3%, halka reer guuraaga uu yahay 62.9%. Waxaa intaa dheer in 39.8% reer guuraaga ay wajahayaan cunno yari “ba’an”, halka bulshooyinka magaalada uu heerkoodu yahay 23.0% marka la barbar dhigo tuulooyinka oo ah 21.8%.
- Saddexda nooc ee dhibaatooyinka ay sheegeen qoysaska 24-kii bilood ee ka horreeyay xilliga sahanka ayaa kala ahaa: Sicir barar cunnada ah (53.3%), abaar iyo biyo yari baahsan (47.3%) iyo dhimashada xoolaha (14.6%)
- Dhibaatooyinkaas ayaa horseeday in kala bar qoysaska ay saameeyeen ay lumiyaan dakhligooda (44.8%), iyadoo 10.9% ay waayeen hantidooda, halka 33.2% ay khasaareen dakhli iyo hantiba. Dadka ay dhibaataada saameysay ee magaalooyinka iyo tuulooyinka ayay u badan tahay inay lumiyeen dakhli oo keliya (41.9% magaalooyinka iyo 47.2% tuulooyinka), halka dadka reer guuraaga ee ay dhibaataadu gaartay ay lumiyeen dakhli iyo hantiba (53.7%) (Figure 9.3).
- Qaabka ugu badan ee looga falceliyay dhibaatooyinka ayaa ahaa duco, oo ay sameeyeen 37.4% qoysaska ay saamaysay, halka 21.0% ay isticmaaleen lacagaha keydka u ahaa, 15.7% ayaan waxba ka qaban xaaladda, 12.5% waxa ay yareeyeen isticmaalka cunnada, 8.6% waxa ay kaalmo ka heleen qaraabada/asxaabta, halka 6.1% ay yareeyeen kharashaadka aan cunnada ahayn.



9.1 Gogol-dhig

Cutubkan waxaa lagu soo bandhigay xogta ku aaddan cunno yarida, heerarka ay gaarsiisan tahay iyadoo loo eegayo Miisaanka Cunno Yarida (FIES), dhibaatooyinka kala duwan ee soo wajaha qoysaska, dakhliga iyo hantida lagu waayo dhibaatooyinka iyo qaabka ay dadka uga falceliyaan xaaladahaas.

Sugnaanshaha cunnada ayaa loola jeedaa marka ay dhammaan xubnaha qoyska ama bulshada ay xilli kasta awoodaan inay helaan cunno nafaqeysan, nadiif ah oo ku filan, taasoo ka haqab-tirta baahidooda iyo rabitaankooda, si ay u helaan nolal caafimaad leh oo ay ku shaqeystaan. Qoysaska Soomaaliya ayaa inta badan la kulma dhibaatooyin soo foodsaara nolashooda bulsho iyo tan dhaqaale, dhibaatooyinkaas oo dad badan u horseeday barakac. Waxaa dhibaatooyinkaas kamid ah musiibooyinka dabiiciga ah, caqabadaha dhaqaale iyo colaadda.

9.2 Jawaabaha ku aaddan cunno yarida

Jadwalka 9.1 waxa uu muujinayaa jawaabaha ay la waraysatayaasha ka bixiyeen noocyada kala duwan ee cunno yarida soo foodsaartay bishii ka horreysay xilliga sahankan. 52.2% bulshada ayaa awoodi waayeen inay helaan cunno nafaqeysan oo caafimaad leh, 47.7% waxa ay ka walaaceen in aanay heli doonin cunno ku filan, halka 43.5% ay isticmaaleen cunno ka yar intii ay u haabnaayeen. 34.9% bulshada ayaa gaajooday, 37.8% waxaa ka dhammaaday cunnada, iyadoo 27.1% ay maalin dhan helin wax ay cunaan.

Xaaladda cunno yarida ayaa ku badan deegaannada reer guuraaga, waxaana uu ku yaryahay magaalooyinka. Tusaale ahaan, 63.3% dadka reer guuraaga ah ayaa ka cabsi qabay in aanay heli doonin cunno ku filan bishii ka horreysay sahankan, halka tirada dadkaas ee ku nool tuulooyinka ay ahaayeen 48.2%, magaalooyinka 44.3%. Sidoo kale cunno yarida xad dhaafka ah ayaa siyaabo kala duwan looga dareemay deegaannada, iyadoo 45.6% reer guuraaga ay maalin qatanaayeen, marka la barbar dhigo dadka ku nool tuulooyinka iyo magaalooyinka (oo kala ahaa 24.8% iyo 24.2%).

Jadwal 9.1: Xaaladda sugnaanta cunnada ee bishii ka horreysay xilliga sahankan

| Dareenka cunno yarida | Tuulo | Magaalo | Reer guuraa | Wadar |
|--|-------|---------|-------------|-------|
| Ka walaacsan in aadan heli doonin cunno kugu filan | 48.2 | 44.3 | 63.3 | 47.7 |
| Aan cunin cunno caafimaad iyo nafaqo leh | 52.1 | 47.7 | 73.7 | 52.2 |
| Cunay noocyo kooban oo cunto ah | 48.7 | 44.2 | 66.8 | 48.3 |
| Aan helin wax la cunno xilliyada qaar | 42.8 | 38.6 | 62.2 | 42.7 |
| Cunay cunno ka yar inta aad u baahan tahay | 41.6 | 40.3 | 62.3 | 43.5 |
| Ay ka dhammaatay cunnada | 36.1 | 34.8 | 55.8 | 37.8 |
| Baahan balse aan wax cunin | 34.0 | 31.7 | 52.3 | 34.9 |
| Maalin dhan aan waxba cunin | 24.8 | 24.2 | 45.6 | 27.1 |

9.3 Miisaanka sugnaan la'aanta cunnada


Sideedda su'aalood ee ku xusan jadwalka 9.1 ayaa qeyb ka ah qaab ay diyaarisay ha'yadda Cunnada iyo Beeraha ee Qaramada Midoobay (FAO) oo lagu garto qoysaska ay dhibaataadu ka haysto helitaanka cunnada, waxaana lagu soo koobay tilmaame loo yaqaano Miisaanka Sugnaan La'aanta Cunnada (FIES). Su'aalaha kala duwan ee ku aaddan cunno la'aanta ee la weydiiyay dadka la waraystay ayaa lagu soo koobay hal nooc oo heerka bulshada ah, taasoo fududeysay in isbabar dhig lagu sameeyo dalalka kala duwan. FIES ayaa laga dhigay tilmaanta (2.1.2) ee bartilmaameedka 2.1 ee Yoolasha Horumarka Waara.¹²

¹² "In marka la gaaro sanadka 2030 la soo afjaro gaajada, isla markaana la xaqiijiyo in dhammaan dadka, gaar ahaan kuwa saboolka ah iyo kuwa nugul sida carruurta ay helaan cunno nafaqo leh oo ku filan sanadka oo dhan."

Iyadoo la isticmaalayo miisaanka FIES ayaa dadka la waraystay waxaa loo kala saaray kuwo wajahaya heerarka cunno yarida “dhexdhexaadka ah” iyo midka “ba’an”. Sida ay sheegtay hay’adda FAO: “Dadka wajahaya cunno yarida dhexdhexaadka ah ayaa cuna raashin tayadiisu hooseyso, waxaana suuragal ah inay mararka qaar ku qasbanaadaan inay yareeyaan xaddiga cuntada ay cunaan, halka kuwa wajahaya cunno yarida ba’an ay maalintii oo dhan waxba afka saarin, sababtuna ay tahay inay waayeen lacag ama qaab kale oo ay ku helaan cunno.”

Cunno yarida ayaa ah walaac ka taagan Soomaaliya, sida lagu muujiyay Figure 9.1, kaasoo tusinaya in bulshada inteeda wajahaysa cunno yarida marka loo eego deegaannada. Cunno yarida heerarka “dhexdhexaadka ama ba’an” ayaa saamaysay 44.3% guud ahaan bulshada, halka dhibaata ugu weyn ay gaartay reer guuraaga (62.9%). Waxaa intaa dheer in 39.8% reer guuraaga ay wajahayaan cunno yari “ba’an” marka la barbar dhigo dadka ku nool magaalooyinka (23.0%) iyo tuulooyinka (21.8%).

Figure 9.1: Miisaanka FIES ee deegaannada kala duwan



9.4 Sababaha keena dhibaatooyinka

Jadwalka 9.2 waxa uu muujinayaa dhibaatooyinka ay la kulmeen qoysaska Soomaaliyeed 24-kii bilood ee ka horreeyay xilliga sahankan. Saddex nooc ee ugu waaweyn dhibaatooyinka ay sheegteen qoysaska ayaa kala ah sare u kac ballaaran oo ku yimid qiimaha cunnada (53.3%), abaar iyo biyo yari baahsan (47.3%) iyo dhimashada xoolaha (14.6%).

Deegaan ahaan, dadka reer guuraaga ayaa ah kuwa ugu badan ee ay saameeyeen abaarta iyo biyo yarida (87.2%) iyo dhimashada xoolaha (51.2%), waxaana soo raaca qoysaska ku nool tuulooyinka oo ay dhibaatooyinkaas saameeyeen (52.6% iyo 18.9% sida ay u kala horreeyaan). Waxaase kooban saameynta ay dhibaatooyinkaas ku yeeshaan


qoysaska ku nool magaalooyinka (36.6% iyo 5.0% sida ay u kala horreeyaan).

Magaalooyinka ayaa waxaa saameeya dhibaatooyin kala duwan, sida colaadda oo saamaysa 3.1% bulshada, halka deegaannada reer guuraaga iyo tuulooyinka ay saamayso 3.1% iyo 3.1% sida ay u kala horreeyaan.

Sida la filo karo, qoysaska tuulooyinka ayaa waxaa inta badan saameeya dhibaatooyinka khuseeya beeraha, sida qiima dhaca sicirka dalaga oo saameeya 3.0%, halka saameyntaas ay 2.0% iyo 0.6% gaarsiisan tahay magaalooyinka iyo deegaannada reer guuraaga, cudurrada ku dhaca dalaga oo saameeya 3.4% qoysaska tuulooyinka marka la barbar dhigo 1.7% magaalooyinka iyo 2.1% reer guuraaga).


Jadwal 9.2: Dhibaatooyinka

| Dhibaatooyinka ay wajaheen qoysaska, goobta waraysiga SIHBS 2022 | | | | |
|--|-------|---------|-------------|-------|
| Nooca dhibaataada | Tuulo | Magaalo | Reer guuraa | Wadar |
| Qiimaha cunnada oo aad sare ugu kacay | 52.4 | 53.6 | 53.7 | 53.3 |
| Abaar ama biyo yari ba'an | 52.6 | 36.6 | 87.2 | 47.3 |
| Dhimashada xoolaha | 18.9 | 5.0 | 51.2 | 14.6 |
| Fatahaad | 4.3 | 3.3 | 2.3 | 3.4 |
| Canug u dhashay qoyska | 2.1 | 3.7 | 1.6 | 3.0 |
| Colaad | 2.0 | 3.1 | 3.1 | 2.8 |
| Geerida xubin ka tirsan qoyska | 1.2 | 3.3 | 0.6 | 2.4 |
| Cudur ku dhacay dalaga | 3.4 | 1.7 | 2.1 | 2.2 |
| Xanuun weyn ama shil ku dhacay qof qoyska ah | 1.5 | 2.6 | 1.5 | 2.1 |
| Qiimaha dalaga oo aad hoos ugu dhacay | 3.0 | 2.0 | 0.6 | 2.1 |
| Qiimaha waxyaabaha beeraha oo aad sare ugu kacay | 1.4 | 2.3 | 0.9 | 1.9 |
| Shaqada oo dhamaatay ama mushaar aan la bixin | 1.3 | 2.3 | 0.3 | 1.8 |
| Kaalmada/lacagaha laga soo diro dibedda oo joogsaday | 2.8 | 1.3 | 1.4 | 1.7 |
| Geerida madaxa qoyska | 1.2 | 1.8 | 0.9 | 1.5 |
| Ganacsiga qoyska oo burburay (aan beeraha ahayn) | 1.0 | 1.7 | 0.7 | 1.4 |
| Kala tagga qoyska (furriinka) | 0.7 | 1.7 | 0.6 | 1.3 |
| Xoolaha oo la dhacay | 1.2 | 1.1 | 2.0 | 1.2 |
| Dhac/kufsi/afduub gaari | 0.0 | 1.5 | 0.0 | 0.9 |
| Guriga oo burburay | 0.6 | 1.1 | 0.6 | 0.9 |
| Geerida qofka u shaqeynayay qoyska | 0.7 | 0.6 | 0.4 | 0.6 |
| Laga raray guriga | 0.1 | 0.7 | 0.1 | 0.5 |
| La xiray/xabsi la dhigay | 0.5 | 0.5 | 0.0 | 0.4 |
| Dab/duufaana | 0.2 | 0.4 | 0.3 | 0.3 |

Figure 9.2: Dhibaatooyinka laga dareemay deegaannada kala duwan (% qoysaska¹³)

Dhibaatooyinkaas ayaa horseeday in ku dhawaad kala bar qoysaska (44.8%) ay waayaan dakhligii soo gali jiray, 10.9% ay lumiyaan hantidooda, halka 33.2% qoysaska ay labaduna isugu darsantay. Qoysaska ku nool magaalooyinka iyo tuulooyinka ee ay saameeyeen dhibaatooyinka ayay u badan tahay inay waayaan oo keliya dakhligooda (41.9% iyo 47.2% sida ay u kala horreeyaan), halka 45.6% qoysaska reer guuraaga ah ee ay ku habsadaan dhibaatooyinkaas ay lumiyaan dakhliga iyo hantidaba (Figure 9.2).

Figure 9.3: Dakhliga iyo hantida qoysaska ee lagu waayo dhibaatooyinka



¹³ "Dhibaatooyinka kale ee dabiiciga ah" waxaa kamid ah dabka, duufaanta, fatahaadda iyo cudurrada ku dhaca dalaga.

"Dhibaatooyinka caafimaadka" waxaa kamid ah geerida, xanuunnada khatarta ah iyo shilalka ku dhaca xubnaha qoyska.

"Dhibaatooyinka amniga" waxaa kamid ah colaadda, dhaca/dilka/tacaddiyada galmada/afduubka baabuurta iyo dhaca xoolaha.

"Dhibaatooyinka dhaqaalaha" waxaa kamid ah khasaaraha ganacsi, in meesha ay ka baxaan gargaarka joogtada ah/kaalmada/lacagaha dibedda laga soo diro, qofka oo waaya shaqadiisa mushaariga ah, ama mushaarka oo la bixin waayo, qiimo koror sare oo ku yimaada waxyaabaha lagu isticmaalo beeraha iyo qiimo dhac ku yimaada dalaga.

"Dhibaatooyinka kale" waxaa kamid ah dhalashada, kala tagga qoyska/furriinka, xoog ku raridda, xariga xubin kamid ah qoyska, burburinta goobta uu ku nool yahay qoyska.

Jadwalka 9.3 waxa uu muujinayaa hababka ugu badan ee ay qoysasku uga falceliyeen dhibaataada saamaysay, iyadoo loo eegayo deegaanka. Qaabka ugu badan ee ay qoysaska ku wajaheen dhibaataada ayaa ahaa Alle bari/duco (37.4%), waxaa soo raacay in qoysasku ay dib u isticmaalaan lacagaha keydka u ah (21.0%), halka 15.7% qoysaska aanay waxba ka qaban dhibaataada, 12.5% waxa ay yareeyeen cunnadooda, iyadoo 8.6% ay kaalmo ka heleen qaraabada/asxaabta, halka 6.1% ay dhimeen kharashaadka uga baxa waxyaabaha aan cunnada ahayn.

Qoysaska magaalooyinka ayaa 23.0% waxa ay dhibaatooyinka uga falceliyeen inay isticmaalaan lacagahooda keydka ah, halka qoysaska tuulooyinka iyo kuwa reer guuraaga ee tallaabadaas qaaday ay yihiin 21.4% iyo 13.7% sida ay u kala horreeyaan.

Dadka ku nool tuulooyinka ayaa 5.3% waxa ay kaalmo dheeraad ah ka heleen hay'adaha caalamiga ah marka la barbar dhigo qoysaska magaalada iyo kuwa reer guuraaga ah (2.5% iyo 3.6% sida ay u kala horreeyaan). Ugu dambeyn, qoysaska reer guuraaga ah ayaa u badnaa Alle bariga 43.6% marka la barbar dhigo dadka tuulooyinka iyo kuwa magaalada (41.7% iyo 33.6% sida ay u kala horreeyaan). Qoysaska reer guuraaga ah ee xaaladda faraha ka laabtay ayaa ahaa 18.0% marka la barbar dhigo dadka tuulooyinka iyo kuwa magaalada 15.3% iyo 15.2% sida ay u kala horreeyaan). Qoysaska reer guuraaga ah ee iibiyay xoolahooda ayaa ahaa 11.2%, halka tirada dadkaas ay 4.0% ka ahayd tuulooyinka.


Jadwal 9.3: Ka falcelinta dhibaatooyinka

| Falcelinta qoysaska ee dhibaatooyinka | Tuulo | Magaalo | Reer guuraa | Wadar |
|--|-------|---------|-------------|-------|
| Alle bari/Duco | 41.7 | 33.6 | 43.6 | 37.4 |
| Isticmaalka lacagta keydka | 21.4 | 23.0 | 13.7 | 21.0 |
| Aan waxba sameyn | 15.3 | 15.2 | 18.0 | 15.7 |
| Yareeyay isticmaalka cunnada | 11.9 | 13.9 | 8.6 | 12.5 |
| Kaalmo ka helay qoyska/asxaabta | 10.5 | 8.8 | 5.2 | 8.6 |
| Yareeyay kharashaadka aan cunnada ahayn | 5.8 | 6.2 | 6.3 | 6.1 |
| Lacag ka amaahday qaraabada | 4.2 | 7.2 | 4.2 | 5.9 |
| Soo iibsaday cunnooyin raqiis ah | 2.9 | 5.4 | 2.5 | 4.2 |
| Kaalmo ka helay hay'adaha caalamiga ah | 5.3 | 2.5 | 3.6 | 3.4 |
| iibiyay xoolaha ama digaaga | 4.0 | 0.8 | 11.2 | 3.4 |
| Shaqeeyay saacado dheeraad ah | 1.8 | 4.5 | 1.6 | 3.3 |
| U diray carruurta qoysas qaraabo ah | 1.8 | 2.5 | 1.4 | 2.1 |
| Billaabay ganacsi cusub | 1.1 | 0.8 | 2.3 | 1.1 |
| Kaalmo ka helay hay'adaha maxalliga ah | 0.9 | 1.3 | 0.1 | 1.0 |
| Lacag ka amaahsaday shirkadaha deynta bixiya | 0.8 | 1.0 | 1.1 | 1.0 |
| Kaalmo ka helay dowladda | 0.4 | 1.2 | 0.1 | 0.8 |
| Kaalmo ka helay xarmaha diiniga ah | 0.6 | 1.1 | 0.0 | 0.8 |
| Xubnaha qoyska aan shaqeyn jiray oo shaqo tegay | 0.8 | 0.7 | 0.7 | 0.7 |
| libiyay alaabtayda (qalab, fadhiga guriga, gaariga iwm.) | 0.4 | 1.0 | 0.0 | 0.7 |
| libiyay dhul beereed | 0.8 | 0.6 | 0.3 | 0.6 |
| Meel kale shaqo u doontay muddo bil ah | 1.4 | 0.3 | 0.4 | 0.6 |
| Carruurta ka joojiyay iskuulka si ay u shaqeeyaan | 0.6 | 0.6 | 0.1 | 0.5 |
| libiyay dalag dheeraad ah | 0.1 | 0.7 | 0.0 | 0.4 |
| Kireeyay dhul beereed | 0.4 | 0.3 | 0.2 | 0.3 |
| Lacag ka amaahsaday bangi | 0.2 | 0.1 | 0.4 | 0.2 |

10

DEYNTA, DAKHLIGA,
ADEEGYADA
MAALIYADDA IYO
TIKNOOLAJIYADDA**Farriimo Muhiim ah:**

- Qoysaska Soomaaliyeed ayaa inta badan dakhliga aanay shaqeyn ka hela taakuleyn lacageed (21.3%) iyo wax lacag u dhigma (14.4%). Dadka magaalada ayaan inta badan ku tiirsaneyn lacagaha deeqda ah iyo kaalmooyinka kale.
- Deymaha laga qaato ganacsatada ayaa aad ugu badan Soomaaliya sida ay sheegeen 82.9% qoysaska la waraystay. Waxaa ku soo xiga deymaha laga qaato qaraabada/asxaabta/deriska sida ay sheegeen (17.5%) qoysaska la waraystay. Amaahda laga qaato bangiyada ayaa lagu sheegay 2.0%, halka deynta laga qaato qofka loo shaqeeyo ay tahay 1.7%. Qoysaska ku nool magaalada ayaa hela dhinacyo kala duwan oo ay deymaha ka qaadan karaan marka la barbar dhigo deegaannada kale.
- 20.7% dadka la waraystay ayaa lacago looga soo diray gudaha ama dibedda Soomaaliya 12-kii bilood ee u dambeeyay. 22.2% qoysaska ku nool tuulooyinka iyo magaalooyinka ah ayaa helay lacago loo soo diray, halka reer guuraaga lacagaha loo diray ay ahaayeen 10.8%.
- Lacagaha ayaa inta badan la isugu diraa xawaaladaha (55.4%) iyo telefoonnada (41.5%). Qoysaska magaalooyinka ayaa inta badan ku tiirsan xawaaladaha, halka kuwa reer guuraaga ah ay ku tiirsan yihiin lacagaha telefoonka la isugu diro. Qoysaska tuulooyinka ayaa labaduba ku tiirsan.
- 85.0% dadka da'doodu ka weyn tahay 15 jirka ayaa leh telefoonka gacanta. Dadka waxbarasha ka gaarey heer jaamacad ayaa u badan kuwa wata telefoonka (96.2%) marka la barbar dhigo kuwa aan lahayn aqoonta rasmiga ah (84.0%).
- Lacagaha ay isu diraan dadka telefoonnada haysta ayaa ah 81.8%
- 27.6% dadka da'doodu ka weyn tahay 10 jirka ayaa saddexdii bilood ee la soo dhaafay isticmaalay internet-ka. Qoysaska magaalooyinka ayaa inta badan isticmaalay internet-ka saddexdii bilood ee la soo dhaafay (34.9%), halka isticmaalka tuulooyinka uu ahaa 19.6%.
- Dadka ayaa internet-ka ka isticmaala telefoonadooda (89.6%) halka qoysas dhan 8.9% uu guryaha ugu jiro internet-ka.
- Keliya 8.8% dadka ka weyn 15 jirka ayaa leh koonto bangi. Dadka waxbarasha ka gaarey heer jaamacad ayaa 27.6% leh koontooyin marka la barbar dhigo kuwa aan aqoonta lahayn ee koontooyinka furtay (6.0%).



10.1 Gogol-dhig

Cutubkan waxa lagu soo bandhigay xogta helitaanka iyo ilaha deymaha, dakhliga, adeegyada maaliyadda iyo tiknoolajiyadda. Dakhliga qoyska ayaa ah isu geynta lacagaha ay soo shaqeeyaan dhammaan xubnaha qoyska. Waxaa kamid ah lacagaha laga helo kirada, maalgalinta lacagaha hawlgabka, kaalmada lacageed ama mid u dhiganta.

10.2 Ilaha dakhliga iyo go'aannada isticmaalka

12-kii bilood ee ka horreeyay xilliga la sameeyay sahankan, 21.3% qoysaska ayaa dakhli ahaan u helay lacag kaalmo ah, halka 14.4% ay heleen wax u dhigma lacag. Maalgashiga ayaa ah dakhli aan la shaqeysan oo ay heleen 1.1% dadka ku nool magaalooyinka iyo 0.8% qoysaska tuulooyinka. Qoysaska magaalada ayaa sidoo kale dakhli ka hela kirada guryaha (2.2%) iyo lacagaha hawlgabka (0.3%) (Jadwalka 10.1)

Jadwal 10.1: Ilaha dakhliga aan la shaqeysan

| | Dakhliga maalgashiga | Kirada guryaha | Lacagaha hawlgabka | Kaalmo kaash ah | Kaalmo nooc kale ah |
|------------------|----------------------|----------------|--------------------|-----------------|---------------------|
| Goobta waraysiga | | | | | |
| Tuulo | 0.8 | 0.7 | 0.2 | 29.6 | 16.9 |
| Magaalo | 1.1 | 2.2 | 0.3 | 16.5 | 12.8 |
| Reer guuraa | 1.3 | 0.6 | | 27.7 | 16.8 |
| Wadar | 1.0 | 1.6 | 0.2 | 21.3 | 14.4 |

10.3 Ilaha deymaha

Marka la eego dadka deymaha qaatay 12-kii bilood ee ka horreeyay xilliga sahanka, 82.9% qoysaska ayaa lacagaha ka amaahda ganacsatada, 17.5% waxa ay ka amaahdaan qaraabada/asxaabta/deriska. Deegaan ahaan marka la eego, dadka ku nool magaalooyinka ayaa hela ilo kala duwan oo ay ka qaadan karaan deymaha. 76.8% qoysaska

magaalada waxa ay lacago ka amaahdeen ganacsatada, 20.1% waxa ay deymaha ka qaateen qaraabada/asxaabta/deriska, 3.9% bangiyada ganacsiga, 2.5% qofka ay u shaqeeyaan, halka 1% ama wax ka yar ay lacago ka amaahdeen xawaaladaha ama hay'adaha maxalliga ah (Jadwalka 10.2)

Jadwal 10.2: Ilaha deymaha ee qoyska


| Boqolleyda qoysaska lacagaha deynsaday 12-kii bilood ee u dambeeyay, iyo ilaha amaahda ee goobta waraysiga SIHBS 2022 | | | | |
|---|-------|---------|---------------|-------|
| | Tuulo | Magaalo | Reer guuraaga | Wadar |
| Boqolleyda | 31.3 | 19.3 | 53.3 | 26.8 |
| Ilaha deymaha | | | | |
| Bangiyada ganacsiga | 1.0 | 3.9 | 0.0 | 2.0 |
| Xawaalad | 0.2 | 1.1 | 0.2 | 0.6 |
| Hay'ado maxalli ah | 0.4 | 0.9 | 0.4 | 0.6 |
| Qofka loo shaqeeyo | 1.5 | 2.5 | 0.8 | 1.7 |
| Ganacsade | 87.3 | 76.8 | 88.3 | 82.9 |
| Qaraabo/Asxaab/Deris | 14.2 | 20.1 | 17.0 | 17.5 |
| Madasha telefoonnada | 0.0 | 0.3 | 0.0 | 0.1 |

10.4 Lacagaha la soo diro

Qoysaska ayaa 20.7% waxaa lacago looga soo diray gudaha dalka ama dibeddiisa, 12-kii bilood ee ka horreeyay xilliga la sameeyay sahankan. (Figure 10.1)

Dhanka farqiga jinsiga, 14.5% dumarka ayaa hela lacagaha la soo diray marka la barbar dhigo 13.2% oo ragga ah. Deegaan ahaan, qoysaska ku nool magaalooyinka (22.2%) iyo kuwa tuulooyinka (22.2%) ayaa ku tiirsan lacagaha dibedda laga soo xawillo, halka 10.8% qoysaska reer guuraaga ay helaan lacagahaas.

Figure 10.1: Boqolleyda qoyska lacagaha looga soo diray gudaha ama dibedda Soomaaliya 12-kii bilood ee u dambeeyay



Lacagaha ayaa inta badan la isugu diraa xawaaladaha (55.4%) iyo telefoonka (41.5%). Deegaan ahaan, qoysaska magaalooyinka ayaa inta badan ku tiirsan xawaaladaha (62.0%), halka lacagaha lagu diro telefoonka ay inta badan isticmaalaan qoysaska reer guuraaga ah (72.3%). Qoysaska ku nool tuulooyinka ayaa ku tiirsan xawaaladaha iyo weliba lacagaha la isugu diro telefoonka.

Jadwal 10.3 Qaabka xawilaadda lacagaha ay helaan qoysaska, bil ka hor inta aan la qaban sahanka, SIHBS 2022

| Qaabka xawilaadda | Tuulo | Magaalo | Reer guuraa | Wadar |
|---------------------|-------|---------|-------------|-------|
| Xawaalad | 46.8 | 62.0 | 25.6 | 55.4 |
| Bangi | 0.2 | 1.8 | 0.0 | 1.2 |
| Lacagaha telefoonka | 50.8 | 34.4 | 72.3 | 41.5 |
| Qof la soo mariyay | 2.2 | 1.8 | 2.2 | 1.9 |
| Wadar | 100.0 | 100.0 | 100.0 | 100.0 |

TIKNOOLAJIYADDA IYO ADEEGYADA MAALIYADDA

10.5 Helitaanka iyo Lahaanshaha Telefoonka Gacanta

Jadwalka 10.4 waxa uu muujinayaa tirada bulshada da'deedu ka weyn tahay 15 jirka ee haysata telefoonka gacanta, waxaana xog ururinta lagu ogaaday in 85.0% bulshada ay leeyihiin telefoonka gacanta. Guud ahaan, lahaanshaha telefoonka ayaa xiriir la leh heerka waxbarashada qofka. 96.2% dadka jaamacadda dhigtay ayaa sheegay inay leeyihiin telefoonka gacanta, 90.7% kuwa ka baxay dugsiga sare ay haystaan telefoonka gacanta, iyo 84.0% dadka telefoonada haysta aanay lahayn waxbarasho rasmi ah. Dumarka ayaa u badan dadka heli karaa telefoonada gacanta 3.8%, marka la barbar dhigo ragga 3.2%.

Deegaan ahaan, dadka ku nool magaalooyinka iyo reer guuraaga ayaa ugu badan helitaankooda telefoonka gacanta marka la barbar dhigo reer tuulooyinka (3.9% iyo 3.3% sida ay u kala horreeyaan). Sidoo kale, haysashada telefoonka gacanta ayaa ku badan dadka aan aqoonta lahayn iyo kuwa gaaray heerka dugsiga hoose (3.5% iyo 5.2% sida ay u kala horreeyaan) (Jadwalka 10.4)

Dadka telefoonada haysta ee isticmaala adeegyada maaliyadda ayaa ah 81.8% (jadwalka 10.4). Waxaa dadkaas u badan kuwa ku nool magaalooyinka (83.2%), waxaa soo raaca kuwa ku nool tuulooyinka (79.7%). Marka la eego heerka waxbarashada, dadka wax qora oo akhriya ayaa telefoonadooda u isticmaala adeegyada maaliyadda, iyadoo dadka dhigtay dugsiga sare (88.0%) iyo kuwa dhigtay jaamacadaha (95.3%) ay yihiin tirada ugu badan ee telefoonada ka isticmaala adeegyada maaliyadda.

Jadwal 10.4: Lahaanshaha telefoonada iyo isticmaalka adeegyada maaliyadda


| Boqolleyda bulshada da'doodu ka weyn tahay 15 jirka ee haysta telefoonada, iyo isticmaalka adeegyada maaliyadda, SIHBS 2022 | | | |
|---|----------------------------|---|---|
| Lahaanshaha telefoonada iyo Isticmaalkooda | Leh telefoon gacanta ah | Heli kara telefoon gacanta ah ¹³ | U isticmaalay telefoonka adeegyada maaliyadda saddexdii bilood ee la soo dhaafay |
| Jinsiga | | | |
| Lab | 85.6 | 3.2 | 82.5 |
| Dhedig | 84.5 | 3.8 | 81.1 |
| Heerka ugu sarreeya ee waxbarashada rasmiga ah | | | |
| Aan wax baran | 84.0 | 3.5 | 79.8 |
| Dugsi hoose | 80.4 | 5.2 | 79.1 |
| Dugsi sare | 90.7 | 2.6 | 88.0 |
| Jaamacad | 96.2 | 0.5 | 95.3 |
| Goobta waraysiga | | | |
| Tuulo | 86.2 | 2.6 | 79.7 |
| Magaalo | 85.5 | 3.9 | 83.2 |
| Reer guuraa | 79.9 | 3.3 | 77.6 |
| Wadar | 85.0 | 3.5 | 81.8 |

¹³ Keliya dadka aan lahayn telefoon gacanta ah, balse dadka kale ka qaadan kara.

10.6 Internet-ka

Telefoonnada gacanta ayaa ah qalabka ugu badan ee dadka ay ka isticmaalaan internet-ka, iyadoo ay tiradaas gaarayso 89.6% dadka da'doodu ka weyn tahay 10 jirka. Waxaa soo raaca internet-ka ku xiran guryaha (Figure 10.2). Dadka ayaa sidoo kale internet-ka ka hela goobaha shaqada (0.6%), guryaha qaraabada/asxaabta/deriska (0.6%), halka xarumaha internet-ka iyo kuwa bulshada uu yar yahay isticmaalkooda. Xarumaha sida kuwa waxbarashada ayaan 3-dii bilood ee ka horreeyay sahanka laga raadsan internet.

Figure 10.2: Goobaha laga helo internet-ka



Jadwalka 10.5 waxa uu muujinayaa boqolleyda bulshada da'doodu ka weyn tahay 10 jirka ee heli kara internet-ka iyo meelaha ay ka heleen saddexdii bilood ee ka horreysay xilliga sahankan. Deegaan ahaan, 100% dadka reer guuraaga iyo 99.1% kuwa ku nool tuulooyinka ayaa internet-ka ka isticmaala telefoonnadooda gacanta. Dadka da'doodu ka weyn tahay 10 jirka ee ku nool magaalooyinka ayaa 10.6% waxa ay internet-ka ka helaan guryaha (Khadka u xiran).

Marka la eego heerka waxbarashada, keliya 14.2% kuwa aan lahayn waxbarashada rasmiga ah ayaa adeegsada internet-ka, halka uu isticmaalka internet-ka la jaanqaado heerka waxbarashada, 71.0% dadka isticmaala ayaa ka baxay dugsi sare, 87.1% waxa ay dhigteen jaamacad. Dadka dhigtay dugsiga sare iyo jaamacadaha ayaa 86.9% iyo 82.0% sida ay u kala horreeyaan waxa ay internet-ka ka isticmaalaan telefoonnadooda gacanta, halka (11.5% iyo 15.2% sida ay u kala horreeyaan) ay ka isticmaalaan ay internet-ka guriga.

Jadwal 10.5: Helitaanka Internet-ka

| Boqolleyda bulshada ka weyn 10 jirka ee 3-dii bilood ee la soo dhaafay heli karay internet, iyo goobaha ay ka heleen | | | | | | | | |
|--|--|--------------------------------|-----------------|---------------------|-----------------------|-------------------|--------|-----------------------------------|
| Tilmaamaha | Boqolleyda bulshada 10 jirka ka weyn ee isticmaasha internet | Isticmaalka telefoonka gacanta | Goobaha shaqada | Goobaha internet-ka | Xarumaha waxbarashada | Xarumaha bulshada | Guriga | Guriga qaraabada/asxaabta/deriska |
| Jinsiga | | | | | | | | |
| Lab | 30.8 | 91.2 | 1.0 | 0.2 | 0.0 | 0.0 | 7.1 | 0.4 |
| Dhedig | 24.7 | 87.7 | 0.2 | 0.3 | 0.0 | 0.0 | 10.9 | 0.7 |
| Heerka ugu sarreeya waxbarashada | | | | | | | | |
| Aan wax baran | 14.2 | 93.9 | 0.1 | 0.1 | 0.0 | | 5.1 | 0.7 |
| Dugsi hoose | 30.7 | 91.5 | 0.3 | | 0.0 | 0.0 | 7.2 | 1.0 |
| Dugsi sare | 71.0 | 86.9 | 1.0 | 0.3 | 0.0 | 0.1 | 11.5 | 0.2 |
| Jaamacad | 87.1 | 82.0 | 1.5 | 0.9 | 0.0 | 0.0 | 15.2 | 0.2 |
| Goobta waraysiga | | | | | | | | |
| Tuulo | 19.6 | 99.1 | 0.1 | | | | 0.7 | 0.1 |
| Magaalo | 34.9 | 87.6 | 0.7 | 0.3 | 0.0 | 0.0 | 10.6 | 0.7 |
| Reer guuraa | 2.0 | 100.0 | | | | | | |
| Wadar | 27.6 | 89.6 | 0.6 | 0.3 | 0.0 | 0.0 | 8.9 | 0.6 |

11.2 Lahaanshaha koontada bangiga iyo isticmaalka bangiyada ku xiran telefoonka

Keliya 8.8% bulshada ay da'dooda ka weyn tahay 15 jirka ayaa leh koonto bangi. Dadka ugu badan ee leh koontada bangiyada ayaa waxa ay ku nool yihiin magaalooyinka (10.3%), halka kuwa tuulooyinka ay yihiin 7.7%, reer guuraagana 2.0%. Marka la eego heerka waxbarashada, tirada dadka da'doodu ka sarayso 15 jirka ee koontooyinka ku leh bangiyada ayaa sare u kaca markasta oo uu kordho heerka waxbarashada qofka (jadwal 10.6)

Jadwal 10.6: Bulshada leh koontooyinka bangiga

| Boqolleyda bulshada ka weyn 15 jirka ee leh koontooyin bangi, SIHBS, 2022 | |
|---|------------------|
| Tilmaamaha | Leh koonto bangi |
| Jinsi | |
| Lab | 11.5 |
| Dhedig | 6.4 |
| Heerka ugu sarreeya waxbarashada | |
| Aan wax baran | 6.0 |
| Dugsi hoose | 8.2 |
| Dugsi sare | 13.2 |
| Jaamacad | 27.6 |
| Goobta waraysiga | |
| Tuulo | 7.7 |
| Magaalo | 10.3 |
| Reer Guuraa | 2.0 |
| Wadar | 8.8 |



Hay'adda Istaatistikada Qaranka

